1.6 ISUGEYNTA IYO KALAGOYNTA LABA TIRO OO MIN LABA-GODLE AH OO LEH TIRO QAADASHO IYO AMAHASHO

1.6.1 Isugeynta laba tiro oo min laba-godle ah oo leh tiro Qaadasho


Tusaale

Isugeeya $26 + 37 = \underline{\quad}$



Sidaas darteed $26 + 37 = 63$

Korka isugeynta aan ka shagaynay anaga oo adeegsanayna sawirada sidan soo socota ayaan astirooyin inaga oo adeegsanayna uga shaqayn karnaa



Marka aan raadinayno wadarta $26 + 37$ ugu horraynta biirooyinka ayaan joog isku hoos qoraynaa.

- 6 iyo 7 koowaad (xabadood) waa 13
 - 3da koowaad ku hoos qora
 - Qaata 1 toban
 - 2, 3 iyo 1 tobnaad waa 6 tobnaad
 - 6 da ku hoos qoora tobnaadka
- Sidaas darteed $26 + 37 = 63$

LAYLIS 44

1 Isugeeya

b	$\begin{array}{r} 66 \\ + 29 \\ \hline \end{array}$	t	$\begin{array}{r} 35 \\ + 48 \\ \hline \end{array}$	j	$\begin{array}{r} 29 \\ + 63 \\ \hline \end{array}$	x	$\begin{array}{r} 24 \\ + 18 \\ \hline \end{array}$
----------	---	----------	---	----------	---	----------	---

2 Biirooyinka joog isku hoos qora oo isugeeya.

b	$19 + 46 = \underline{\quad}$	t	$17 + 64 = \underline{\quad}$	j	$49 + 16 = \underline{\quad}$
x	$34 + 27 = \underline{\quad}$	kh	$65 + 27 = \underline{\quad}$		

3 Sanduuqa dhexdiisa calaamadaha $>$, $<$ ama $=$ ta ku haboon ku buuxiya.

b $26 + 38$ $24 + 19$ **t** $65 + 16$ $87 + 18$

j $19 + 42$ $65 + 16$ **x** $35 + 27$ $14 + 48$

LAYLIS 45

- 1 Ardayda fasalka labaad ku Jirta 28 waa inamo 16 na waa gabdho. Dhammaan ardayda fasalku waa imisa?
- 2 Dukaan dharka lagu iibiyo waxa yaala 35 daaqadood oo dhar cad ah iyo 27 daaqadood oo dhar buluug ah. Dukaanka imisa daaqadood oo dhar ah ayaa yaala?
- 3 Nin xoola-dhaqata ah ayaa haysta 47 neef oo adhi ah iyo 29 neef oo riyo ah. Dhammaan imisa neef ayuu leeyahay?
- 4 Caasha alaabo ay iibsatay waxay cashur ka bixisay 73 birr sidoo kale Xaliimana alaabaday iibsatay cashurtay ka bixisay waa 38 birr. Labadoodu dhammaan cashurtay bixiyeen waa imisa?
- 5 Sallad ayaa waxa ku Jirta 48 xabadood oo liin macaan ah. Sallad kalena waxa ku Jirta 17 xabadood oo liin macaan ah. Dhammaan labada salladood imisa xabadood oo liin macaan ah ayaa ku jirta?

1.6.2 Kalagoynta laba tiro oo laba-godle ah oo leh Amaahasho

Tusaale 1

Tirada 34 imisa tobnaad iyo imisa koowaad ayey leedahay?

34 waxay leedahay 3 tobnaad iyo 4 koowaad.

3 tobnaad iyo 4 koowaad, waxa loo qora $30 + 4$

Sidaas darteed $34 = 30 + 4$

LAYLIS 46

Meelaha bannaan buuxiya

1 45 waxay leedahay 4 tobnaad iyo 5 koowaad.

Sidaas darteed $45 = \underline{40} + \underline{5}$


2 73 waxay leedahay _____ tobnaad iyo _____ koowaad.

Sidaas darteed $73 = \underline{\quad} + \underline{\quad}$

3 54 waxay leedahay _____ tobnaad iyo _____ koowaad.
Sidaas darteed $54 = \underline{\quad} + \underline{\quad}$

Tusaale 2

Tobanada tirada $34 = 30 + 4$ marka 1 toban laga qaado (amaahdo) oo koowaadyo loo beddelo waxa loo habeeya oo loo qoraa sida hoos lagu dhigay



LAYLIS 47

Sanduuqyada tirooyinka ku haboon ku buuxiya.

- | | |
|---|---|
| b $72 = 70 + 2 = 60 + 12$ | t $54 = 50 + \square = 40 + \square$ |
| j $36 = 30 + \square = 20 + 12$ | x $81 = 80 + \square = 70 + \square$ |
| kh $47 = \square + 7 = \square + 17$ | d $65 = \square + 5 = \square + 15$ |
| r $93 = \square + 3 = \square + 13$ | s $28 = \square + 8 = \square + 18$ |


Tusaale 3

Kalagooya 53 – 26

TALAABADA 1^{AAD}
3 kama goyn karno 6.
1 toban ayaan ka qaadanaynaa (amaahanay na) 5 ta tobnad anaga oo reebayna 4 tobanu.
1 ka toban waxaan u badalaynaa 10 koowaad yo (xabo).
10 koowaad iyo 3 waa 13 koowaad

TALAABADA 2^{AAD}
 $13 - 6 = 7$
7da waxaan ku qorayna godka koowaadka.

TALAABADA 3^{AAD}
 $4 - 2 = 2$
2 da waxaan ku qoraynaa godka tobnandka.



LAYLIS 48

U kalagooya sida tussalaha kor ku tusan

1 Idinka oo adeegsanaya kaarar toban toban u taxan iyo kaarar hal, halka.

b $46 - 28 = \underline{\quad}$ **t** $54 - 36 = \underline{\quad}$ **j** $72 - 57 = \underline{\quad}$

2 Kala goo ya.

b
$$\begin{array}{r} 56 \\ - 29 \\ \hline \end{array}$$

t
$$\begin{array}{r} 92 \\ - 36 \\ \hline \end{array}$$

j
$$\begin{array}{r} 83 \\ - 47 \\ \hline \end{array}$$

x
$$\begin{array}{r} 64 \\ - 28 \\ \hline \end{array}$$

kh
$$\begin{array}{r} 95 \\ - 67 \\ \hline \end{array}$$

d
$$\begin{array}{r} 72 \\ - 45 \\ \hline \end{array}$$

Hawlgal-7

Idinka oo laba laba (lammaane) isku kooxaynaya ka shaqeeya.

1 Kalagooya $67 - 32$

2 **b** $7 - 2$ **t** $60 - 30$ **j** Isugeeya faraaqa (b) iyo (t)

3 Isbarbardhiga natiijada aad kala kulanteen (1) iyo (2. J)

Hawsha koree ee aad ka sooshaqayseen sidan ayaa loo qori kara

Tusaale 4

$$\begin{array}{r} 67 \\ -32 \\ \hline \end{array} = \begin{array}{r} 60 \\ -30 \\ \hline \end{array} + \begin{array}{r} 7 \\ -2 \\ \hline \end{array} \quad \text{Sidaas darteed} \quad \begin{array}{r} 67 \\ -32 \\ \hline 35 \end{array}$$

$$\underline{\underline{30}} + \underline{\underline{5}} = \underline{\underline{35}}$$

LAYLIS 49

Idinka oo tusaalaha raacaya soo saara faraaqa.

b
$$\begin{array}{r} 76 \\ - 24 \\ \hline \end{array}$$

t
$$\begin{array}{r} 87 \\ - 35 \\ \hline \end{array}$$

j
$$\begin{array}{r} 49 \\ - 21 \\ \hline \end{array}$$

x
$$\begin{array}{r} 56 \\ - 32 \\ \hline \end{array}$$

Tusaale 5

Kalago 83 – 47

Ufiirso 3 – 7 lagama shaqayn karo.

Sidaas darteed 83 waxaan u qoraynaa sidan

$$83 = 70 + 13$$

Imika

$$\begin{array}{r} 83 \\ -47 \\ \hline \end{array} = \left\{ \begin{array}{r} 70 \\ -40 \end{array} \right\} + \left\{ \begin{array}{r} 13 \\ -7 \end{array} \right\}$$

$$\text{Sidaas darteed } \frac{\left\{ \begin{array}{r} 70 \\ -40 \end{array} \right\} + \left\{ \begin{array}{r} 13 \\ -7 \end{array} \right\}}{\underline{\underline{30 + 6}}} = \frac{\begin{array}{r} 83 \\ -47 \\ \hline 36 \end{array}}{\underline{\underline{36}}} \text{ ama } 83 - 47 = 36$$

LAYLIS 50

Sida tusaalaha sare u kalagooya

- | | | | | | | |
|----------|----------|-----------------|-----------|-----------------|----------|-----------------|
| 1 | b | 32 – 14 = _____ | t | 72 – 48 = _____ | j | 91 – 24 = _____ |
| | x | 63 – 47 = _____ | kh | 73 – 35 = _____ | d | 62 – 29 = _____ |

1.6.3 Hubinta (xaqiiqinta) kalagoynta ama isugeynta

Kala goynta waxa lagu hubin karaa isugeyn.

Tusaale 6

51

-33 kalagoynta sidee loo hubin karaa?

18

$$\begin{array}{r} \text{Hubin } 33 \\ +18 \\ \hline 51 \\ \hline \end{array}$$

La gooyaha 33 iyo faraqa 18 marka la isugeeyay waxay noqdeen laga gooyaha 51 sidaas darteed hawsha xisaabinta Kala goyntu waa sax.

Xusuus

$$\begin{array}{r} 51 \leftarrow \text{Laga gooye} \\ -33 \leftarrow \text{La gooye} \\ \hline 18 \leftarrow \text{Faraq} \end{array}$$

Isugeynta waxaa lagu hubin kara kalagoyn

Tusaale 7

$$\begin{array}{r} 34 \\ +27 \text{ Hawshan isugeynta sidee loo hubin karaa?} \\ \hline 61 \\ \hline \end{array}$$

$$\begin{array}{r} 61 \\ \text{Hubin } -27 \text{ ama } -34 \\ \hline 34 \qquad \qquad 27 \\ \hline \end{array}$$

Wadarta 61 marka laga gooyay biirada 27 waxay noqotay oo la helay biirada kale 34 sidaas darteed. Hawsha isugeyntu waa sax.

Xusuus

$$\begin{array}{r} 34 \leftarrow \text{Biiro} \\ +27 \leftarrow \text{Biiro} \\ \hline 61 \leftarrow \text{Wadar} \end{array}$$

LAYLIS 51

1 Kalagoynta laga shaqeyey isugeyn ku hubi

$$\begin{array}{r} \mathbf{b} \quad 47 \\ - 21 \\ \hline 26 \end{array} \quad \mathbf{t} \quad \begin{array}{r} 62 \\ - 48 \\ \hline 14 \end{array} \quad \mathbf{j} \quad \begin{array}{r} 84 \\ - 39 \\ \hline 45 \end{array}$$

2 Isugeynta laga shaqeyey kalagoyn ku hubi

$$\begin{array}{r} \mathbf{b} \quad 56 \\ + 29 \\ \hline 85 \end{array} \quad \mathbf{t} \quad \begin{array}{r} 76 \\ + 18 \\ \hline 94 \end{array} \quad \mathbf{j} \quad \begin{array}{r} 36 \\ + 49 \\ \hline 85 \end{array} \quad \mathbf{x} \quad \begin{array}{r} 63 \\ + 24 \\ \hline 87 \end{array}$$

3 Kalagooya. Natiijada na isugeyn ku hubiya

b
$$\begin{array}{r} 28 \\ - 11 \\ \hline \end{array}$$

t
$$\begin{array}{r} 64 \\ - 28 \\ \hline \end{array}$$

j
$$\begin{array}{r} 63 \\ - 26 \\ \hline \end{array}$$

x
$$\begin{array}{r} 88 \\ - 56 \\ \hline \end{array}$$

4 Isugeeya. Natiijadana kalagoyn ku hubiya

b
$$\begin{array}{r} 14 \\ + 28 \\ \hline \end{array}$$

t
$$\begin{array}{r} 36 \\ + 57 \\ \hline \end{array}$$

j
$$\begin{array}{r} 62 \\ + 29 \\ \hline \end{array}$$

x
$$\begin{array}{r} 36 \\ + 57 \\ \hline \end{array}$$

LAYLIS 52

- 1** Ardayda fasalka saddexaad waa 75. Kuwa fasalka labaad ku jirtaana waa 39. Ardayda fasalka labaad ku Jirta kuwa fasalka saddexaad imisa ayey ka yar yihiin?
- 2** Qof xoola dhaqata ah ayaa 73 neef oo adhiga uu lahaa ka iibiyay 35 neef. Imisa adhi ah ayaa u hadhay?
- 3** Axmed wuxuu haystey 82 Birr. Haddii uu walaalkii 29 Birr siiyo, imisa Birr ayaa u hadhi?

1.7 WEEDH-XISAABEEDYADA ISUGEYNTA IYO KALAGOYNTA AH ILAA 100

LAYLIS 53

- 1** Cabdi baskiisu wuxuu qaada 45 qof. Hase yeeshee imika waxaa baska ku jirta 20 qof oo qudha. Imisa kursi ayaa bannaan?
- 2** Yuusuf 37 neef oo adhi ah ayuu leeyahay. Haddii uu neef iibiyo 5 na uu walaalkii siiyo imisa neef oo adhi ah ayaa u soo hadhi.
- 3** Tiro marka loo geeyo 25 natiijadu waxay noqotay 68. Soo saara tiradaa.
- 4** Meelaha bannaan tirada ka maqan ku buuxiya.

b 8, 10, 12, _____, _____, _____ 18, _____ 22.

t _____, 60, 70, _____, _____ 100

Cutubka

2aad

$$99$$
$$49 \div 7 = ?$$
$$20 \div 4 = 5$$
$$6 \times 3 = 18$$
$$1$$
$$2$$


ISKUDHUFASHADA IYO ISUQAYBINTA TIROOYINKA IDIL ILAA 100

2.1 NAKHTIINKA ISKUDHUFASHADA 2 AMA 10 IYO TIRO KALE IYO ISUQAYBINTA QAYBSHAHEEDU YAHAY 2 AMA 10

2.1.1 Iskudhufashada tirada 2 ama 10 iyo tiro kale

Kooxo lammaaneyaal (laba laba) ah

Hawlgalka-1



➤ Salladda weyn imisa muus ayaa ku jirta?

- muuska haddii kooxo laba, laba (lammaaneyal) ah aad u kooxeysiin imisa kooxood ayaad helaysiin?
- Koox kasta imisa muus ayaa ku Jirta?
- Tirada kooxaha haddii aad ku dhufatiin koox kasta inta muus ee ku Jirta imisa muus ayaad helaysiin?

Hawsha sare ee la idin siiyey marka aad u fiirsatiin dabadeed waxaad fahmaysiin, Weedhan soo socota.

$$2 + 2 + 2 + 2 = 4 \times 2 = 8$$

waxayna ka dhigan tahay afar qindi (afar min labo labo ah) waxaana loo akhriyaa **afar jeer oo min laba ah waxay le'eg tahay siddeed**

Hawlgalka - 2

Deeqa waxay haysataa laba xidhmo oo qoryo ah:











Haddii xidhmo waliba ay ka kooban tahay 10 qoryo, Deeqa imisa qoryo ayey haysataa?

$$10 + 10 = 20$$

$$2 \times 10 = 20$$

LAYLIS 1

Dhisa (sameeya) shax Iskudhufasha ah oo ilaa 20 gaadhaysa oo ka kooban lammaaneyad.

	1 koox oo min 2 ah, $2 = 1 \times 2 = $ <u>2</u>
	2 kooxood oo min 2 ah $2 + 2 = 2 \times 2 = $ <u>4</u>
	3 kooxood oo min 2 ah $2 + 2 + 2 = 3 \times 2 = $ <u>6</u>
	$2 + 2 + 2 + 2 = 4 \times 2 = $ <u>8</u>
	_____ = $5 \times 2 = $ <u>10</u>
	_____ = $6 \times 2 = $ ____ .
	_____ = $7 \times 2 = $ ____ .
	_____ = $8 \times 2 = $ ____ .
	_____ = $9 \times 2 = $ ____ .
	$2 + 2 + 2 + 2 + 2 + 2 + 2 + 2 + 2 + 2 = 10 \times 2 = 20$

LAYLIS 2

Dhufsanayaasha 10 soo saara

$$\begin{array}{lll}
 1 \times 10 = 10 \times 1 = \mathbf{10} & 5 \times 10 = 10 \times 5 = \square & 9 \times 10 = 10 \times 9 = \square \\
 2 \times 10 = 10 \times 2 = \mathbf{20} & 6 \times 10 = 10 \times 6 = \square & 10 \times 10 = \mathbf{100} \\
 3 \times 10 = 10 \times 3 = \mathbf{30} & 7 \times 10 = 10 \times 7 = \square & \\
 4 \times 10 = 10 \times 4 = \square & 8 \times 10 = 10 \times 8 = \square &
 \end{array}$$

U FIIRSADA

- Tiro kasta oo eber ka duwan mark lagu dhufsto 10 natiijadu waa tiradii oo dhinaca midig laga raalciyay eber '0'.

Tusaale 1

$$6 \times 10 = 60$$

$$2 \times 10 = 20$$

LAYLIS 3

1 Iskudhufta

$$\mathbf{b} \quad 1 \times 2 = \square$$

$$\mathbf{t} \quad 2 \times 2 = \square$$

$$\mathbf{j} \quad 2 \times 8 = \square$$

$$\mathbf{x} \quad 10 \times 9 = \square$$

$$\mathbf{kh} \quad 8 \times 10 = \square$$

$$\mathbf{d} \quad 6 \times 10 = \square$$

$$\mathbf{r} \quad 2 \times 10 = \square$$

$$\mathbf{s} \quad 6 \times 2 = \square$$

$$\mathbf{sh} \quad 9 \times 2 = \square$$

2 Dhufsaneyaasha 2 ee ilaa 18 ku sugan qora

$$\mathbf{2, 4, 6, \square, \square, \square, \square, \square, \square.}$$

3 Iskudhufta

$$\begin{array}{r}
 \mathbf{b} \quad 6 \\
 \times 2 \\
 \hline
 \hline
 \end{array}$$

$$\begin{array}{r}
 \mathbf{t} \quad 10 \\
 \times 2 \\
 \hline
 \hline
 \end{array}$$

$$\begin{array}{r}
 \mathbf{j} \quad 8 \\
 \times 2 \\
 \hline
 \hline
 \end{array}$$

$$\begin{array}{r}
 \mathbf{x} \quad 9 \\
 \times 2 \\
 \hline
 \hline
 \end{array}$$

$$\begin{array}{r}
 \mathbf{kh} \quad 3 \\
 \times 10 \\
 \hline
 \hline
 \end{array}$$

$$\begin{array}{r}
 \mathbf{d} \quad 9 \\
 \times 10 \\
 \hline
 \hline
 \end{array}$$

4 Qiimaha Doorsoomaha raadiya

Tusaale 2 $b \times 6 = 12$ Sidaas darteed qiimaha b waa 2.

$$\mathbf{b} \quad b \times 5 = 10$$

$$\mathbf{t} \quad x \times 2 = 2$$

$$\mathbf{j} \quad t \times 7 = 70$$

$$\mathbf{x} \quad 2 \times d = 14$$

$$\mathbf{kh} \quad r \times 2 = 20$$

$$\mathbf{d} \quad t \times 2 = 20$$


$$\mathbf{r} \quad c \times 6 = 60$$

$$\mathbf{s} \quad 3 \times f = 30$$

5 Ducaale wuxuu leeyahay 2 Dibi, 2 Awr, 2 dameerood iyo 2 ceesaamood. Ducaale dhamaan imisa neef ayuu leeyahay?

- 6 Haboon bil kasta laba jeer ayey ayeydeed soo booqataa. 5 bilood imisa jeer ayey booqan kari?
- 7 Shimbbirtu waxay leedahay laba lugood. 10 shimbirood imisa lugood ayey leeyihiin?
- 8 Dhufsaneyaasha 10 ee u dhexeeya 40 iyo 100 qora?

Isiro iyo Taran




3 kooxood oo min 2 ah Waa 6

ama

$$3 \times 2 = 2 + 2 + 2 = 6$$

$$3 \times 2 = 6 \text{ sidoo kale } 2 \times 3 = 6$$

$3 \times 2 = 6$ waxaa loo akhriyaa 3 marka lagu dhufto 2 waxay noqotaa 6.



2 kooxood oo min 3 ah waa 6

ama

$$2 \times 3 = 3 + 3 = 6$$

Weedha $3 \times 2 = 6$ dhexdeeda

- Tirooyinka 3 iyo 2 waxa la yidhaahdaa **Isirro (ama Qaybshayaal)**
- Tirada 6 waxa la yidhaahdaa **Taran (ama dhufsane)**

- 9 Shaxdan soo socota buugagtiina ku roga. Dabadeedna kala sooca Isirada iyo taranta.

	Isiro	Taran
Tusaale	$2 \times 6 = 12$	2 iyo 6
	$9 \times 2 = 18$	
	$10 \times 2 = 20$	
	$2 \times 8 = 16$	
	$4 \times 10 = 40$	

- 10 Weedhahan u kala saar run ama been

- b** 2 iyo 4 tarantoodu waa 8 **f** 14 dhufsane ayey u tahay 7
- j** 5 iyo 2 waa isirada tirada 15 **x** 30 waa dhufsanaha tirooyinka 10 iyo 7

- 11 Meelaha bannaan buuxiya

- b** 8 iyo 2 tarantoodu waa **f** $10 \times 4 = \square$ **j** $4 \times 10 = \square$
- x** 60 dhufsane ayey u tahay tirada 10 iyo tirada _____

2.1.2 isuqaybinta qaybsha heedu yahay 2 ama 10 ee aan hadhaaga lahayn

Hawlgalka-3

Bare Daahir haddii uu 12 kubbadood u qaybiyo 2 kooxood imisa kubbadood ayey koox kasta heli?

Hawshan waxaan ka fahmaynaa in 2 jeer oo min lix ahi ay tahay 12. Taasina waxay ka dhigan tahay $2 \times 6 = 12$. Sidaas darteed.


$$\text{Haddii ay } 2 \times 6 = 12$$

$$\text{dabadeedna } 12 \div 2 = 6 \text{ ayey noqon}$$



Weedha $12 \div 2 = 6$ waxaa loo akhiryaa. **12 marka loo qaybiyo 2 waxay noqotaa 6.** Weedhan isuqaybinta ah dhexdeeda tirada 12, **La qaybshe tirada 2 qaybshe tirada 6 na qayb ayaa la yidhaahdaa.**

Hawlgalka-4



$$4 \times 10 = 40$$

Tirada kuushu waa imisa? **40.**

Imika eeg kooxaynta (ama taxa) cusub ee kuusha.

Kooxaha (taxa) kuushu waa imisa? **4.**

Imisa kuulood ayaa koox (tax) kasta ku jirta **$40 \div 4$.**

Shaqada isuqaybinta, iskudhufasho miyaa lagu hubin karaa $40 \div 4 = 10$

$$\text{Waayo } 4 \times 10 = 40$$

$$\text{Sidoo kale } 10 \times 4 = 40$$

LAYLIS 5

1



b

Tirada nacquu waa imisa?



† 14 imisa kooxo oo min laba laba (lammaane) ah ayey ka kooban tahay)?

$14 \div 2 = \underline{\hspace{2cm}}$.

2



$18 \div 2 = \underline{\hspace{2cm}}$

3

Shaxdan buugtiina ku roga: dabadeedna buuxiya

b	t	10	20	30	40	50	60	70	80
	$t \div 10$				4				

†	c	8	6	14	18	12	10
	$c \div 2$						

U FIIRSADA

Weedha $6 \div 2 = 3$ guud ahaan waxa loo qoraa $2 \overline{)6}^3$


Isuqaybinta iyo Iskudhufashada

Isuqaybinta iyo Iskudhufashada xarriiqda tirada dusheeda ayaan kaga shaqayn karnaa.

ISUQAYBIN

b Imisa lammaane (qindi) ayaa 12 ku Jirta?

$12 \div 2 = \underline{\hspace{2cm}}$.




$12 \div 2 = 6$

xarriiqda tirada dusheed. La qaybshaha inta aan midigta kaga bilawno ayaan dhinaca bidixda qaybshaha talaabo talaabo uga gooyaynaa ilaa inta aan gaadhayno eber. Inta talaabo waxay Ina siin qaybta.

ISKUDHUFASHO

6 lammaane waa imisa?

$6 \times 2 = \underline{\hspace{2cm}}$.




$6 \times 2 = 12$

Tirada eber inta aan kaga bilawno ayaan dhinaca midigta 6 laba laba halbeeg ah u tirinaynaa. Tirada aan helno oo 12 ah waa taranta 6 iyo 2.

† Imisa kooxood oo min lix ah ayaa 12 ku jirta?

$$12 \div 6 = \underline{\quad}$$



$$12 \div 6 = 2 \text{ sidaas darteed } 2 \times 6 = 12$$

LAYLIS 6

Buugtiina ku roga oo dhamaystira

b $14 \div 2 = \square$

t $16 \div 2 = \square$

j $18 \div 2 = \square$

x $\square \times 2 = 14$

kh $\square \times 2 = 16$

d $\square \times 2 = 18$

r $14 \div 7 = \square$

s $16 \div 8 = \square$

sh $18 \div 9 = \square$

dh $\square \times 7 = 14$

c $\square \times 8 = 16$

g $\square \times 9 = 18$

UFIIRSADA!

Natiijada isugaybinta waxa lagu hubin karaa iskudhufasho

Hawsha isugaybinta goor kasta marka qaybshaha iyo qaybta la isku dhufto waxay noqotaa laqaybshaha.

Tusaale 1

$$\begin{array}{ccc}
 16 & \div & 2 = 8 \\
 \downarrow & & \downarrow \\
 \text{LAQAYBSHE} & & \text{QAYBE} \\
 & \downarrow & \\
 & \text{QAYBSHE} &
 \end{array}$$

Waayo $8 \times 2 = 16$ ama $2 \overline{)16}^8$

UFIIRSADA!

Isugaybinta waxa lagaga shaqayn karaa kalagoyn lagu celceliyo

Tusaale 2

$6 \div 2 =$

6 da kuul markiiba haddii aan laba laba kuul ka qaadno 3 Jeer dabadeed kuushu way dhamaan.

1	2	3
6	4	2
<u>-2</u>	<u>-2</u>	<u>-2</u>
<u>4</u>	<u>2</u>	<u>0</u>

Ilaa eber inta aan gaadhayno 6 saddex Jeer ayaa 2 laga goyn karaa:

Taasi waxaa ka dhigan tahay 6 waxaa ku Jirta 3 qindi (lammaane) ama 3 kooxood oo min 2 kuulood ah.

Sidaas darteed; $6 \div 2 = 3$.

Tusaale 3

12 markii waliba haddii 2 laga gooyo imisa jeer ayaa laga goyn ilaa inta ay dhamaanayso?

12	10	8	6	4	2
- 2	- 2	- 2	- 2	- 2	- 2
<u>10</u>	<u> </u>	<u> </u>	<u> </u>	<u> </u>	<u> </u>

$2 - 2 = 0$ $4 - 2 = 2$ $6 - 2 = 4$ $8 - 2 = 6$ $10 - 2 = 8$ $12 - 2 = 10$

12 ilaa inta ay dhamaanayso 6 jeer oo laba laba ah ayaa laga goyn karaa.

Sidaas darteed, $12 \div 2 = 6$

LAYLIS 7

Isuqaybiya Idinka oo adeegsanaya kalagoyn ku celcelin ah

b $4 \div 2$

t $8 \div 2$

$$\begin{array}{r} 8 \div 2 \\ \underline{-2} \quad \underline{-2} \quad \underline{-2} \quad \underline{-2} \\ 6 \quad 4 \quad 2 \quad 0 \end{array}$$

Sidaas darteed $8 \div 2 = 4$

j $18 \div 2$

x $10 \div 2$

kh $20 \div 2$

d $14 \div 2$

2.2 ISKUDHUFASHADA 0 AMA 1 IYO TIRO KALE IYO ISUQAYBINTA QAYBSHAHEEDU YAHAY 1

2.2.1 Iskudhufashada 0 ama 1 iyo Tiro kale

Hawlgalka-5

Caasha 1 kiiloo oo liin ah. haddii ay gaddo. Imisa Birr ayey heli?

$$1 \times 7 = 7 \text{ Birr}$$

Caasha maalin haddii aan liin laga iibsanin imisa Birr ayey maalintaas heli?

$$0 \times 7 = 0$$

Qiimaha

1 kiilo muus ah 5 Birr
1 kiilo liin ah 7 Birr

U FIIRSADA

Xaqqiyooyinkan soo socda

➤ *Tiro kasta marka lagu dhufto 1 natiijadu waa isla tiradii oo aan isbedalin.*

Tusaale 1

$$1 \times 4 = 4 \text{ ama } 4 \times 1 = 4$$

$$1 \times 9 = 9 \text{ ama } 9 \times 1 = 9$$

➤ *Tiro kasta marka lagu dhufto 0 natiijadu waa 0*

Tusaale 2

$$9 \times 0 = 0 \text{ ama } 0 \times 9 = 0,$$

$$13 \times 0 = 0 \text{ ama } 0 \times 13 = 0$$

LAYLIS 8

Soo saar taranadan soo socota

$$b \quad 5 \times 1 = \square$$

$$t \quad 16 \times 1 = \square$$

$$j \quad 1 \times 10 = \square$$

$$x \quad 6 \times 0 = \square$$

$$kh \quad 0 \times 8 = \square$$

$$d \quad 10 \times 0 = \square$$

$$r \quad 0 \times 9 = \square$$

$$s \quad 2 \times 0 = \square$$

$$sh \quad 30 \times 0 = \square$$

2.2.2 Isuqaybinta laqaybshaheedu yahay 0 Iyo isuqaybinta qaybshaheedu yahay 1

Qaybinta 0 iyo Tiro u qaybinta 1

$$0 \div 4 = 0 \text{ Waayo } 0 \times 4 = 0$$

$$10 \div 1 = 10 \text{ Waayo } 10 \times 1 = 10$$

$$0 \div 10 = 0 \text{ Waayo } 0 \times 10 = 0$$

$$6 \div 1 = 6 \text{ Waayo } 6 \times 1 = 6$$

U FIIRSADA

Xaqiiqooyinkan soo socda

➤ *t haddii ay tahay tiro idil oo ka duwan 0*

$$0 \div t = 0$$

Tusaale 3 $0 \div 9 = 0$, $0 \div 12 = 0$

➤ *Tiro kasta marka loo qaybiyo 1 natijadu waa isla tiradii*

Tusaale 4 $10 \div 1 = 10$, $25 \div 1 = 25$, $0 \div 1 = 0$

➤ *Tiro abadan 0 looma qaybin karo '0'*

c haddii ay tahay tiro idil,

c ÷ 0 macna xisaabeed ma laha

Tusaale 5 $5 \div 0$, $3 \div 0$ ma qeexna

LAYLIS 9

1 Ka shaqeeya kuwa laga shaqayn karayo, Kuwa aan la karayn ma qeexna.

$$b \quad 8 \div 1 = \underline{\quad}$$

$$t \quad 0 \div 2 = \underline{\quad}$$

$$j \quad 4 \div 0 = \underline{\quad}$$

$$x \quad 0 \div 7 = \underline{\quad}$$

$$kh \quad 1 \div 1 = \underline{\quad}$$

$$d \quad 2 \div 0 = \underline{\quad}$$

$$r \quad 0 \div 0 = \underline{\quad}$$

$$s \quad 4 \div 4 = \underline{\quad}$$

2 Meelaha bannaan tirada ku haboon ku buuxiya.

b $7 \div \underline{\quad} = 7$ **f** $\underline{\quad} \div 9 = 0$ **j** $5 \div 1 = \underline{\quad}$.

x $\underline{\quad} \div 4 = 0$ **kh** $12 \div 1 = \underline{\quad}$ **d** $0 \div 10 = \underline{\quad}$.

3 Calaamadaha '<' '>' ama '=' midda ku haboon sanduuqa ku buuxiya.

Tusaale 7 $7 \div 1 > 3$ $2 \times 4 = 16 \div 2$

b $0 \div 2 \square 2$ **f** $0 \div 1 \square 0$ **j** $6 \div 1 \square 6 \times 0$

x $6 \times 2 \square 12 \div 1$ **kh** $8 \times 1 \square 6 \div 1$

4 Dugsi xannaanada carruurta waxaa ku jirta 16 arday. Dugsigu wuxuu leeyahay hal fasal. Fasalka dhexdiisa imisa arday ah ayaa ku jirta?

2.3 ISKUDHUFASHADA 3,4,5,6,7,8,9 IYO TIRO KALE IYO ISUQAYBINTA QAYBSHAHEEDU YIHIIN 3 ILAA 9

2.3.1 Iskudhufashada 3 iyo Tiro kale Iyo Isuqaybinta Qaybshaheedu yahay 3

Hawlgalka-6

b 3 qori ka sameeya saddexagal.

f Laba saddexagal sameeya Imisa qori ayaad ku Isticmaasheen?



1 saddexagal waxaa uu u baahan yahay 3 qori
 $1 \times 3 = 3$



2 saddexagal waxay u baahan yihiin $3 + 3 = 6$ qori
ama $2 \times 3 = 6$

Sidoo kale



$3 \times 3 = 9$



$4 \times 3 = 12$

Hawsha sare aad ku soo aragteen waxaan ka samayn karnaa shaxda isku dhufashada ee 3.

$1 \times 3 = 3$	waxaana loo akhriya sidan	1 saddeex waa 3
$2 \times 3 = 6$		2 jeer oo min saddex ah waa 6
$3 \times 3 = 9$		3 jeer oo min saddex ah waa 9
$4 \times 3 = 12$		4 jeer oo min saddex ah waa 12
$5 \times 3 = 15$		_____.
$6 \times 3 = 18$		_____.
$7 \times 3 = 21$		_____.
$8 \times 3 = 24$		_____.
$9 \times 3 = 27$		_____.
$10 \times 3 = 30$		10 jeer oo min saddex ah waa 30

LAYLIS 10

1 Shaxda isku dhufashada ee 3 idinka oo adeegsanaya isku aadiya weedhaha isu dhigma. Fallaadh ku tusa kuwa isu dhigma.

B

- 1 4 jeer oo min saddex ah waa 12
- 2 9 jeer oo min saddex ah waa 27
- 3 5 jeer oo min saddex ah waa 15
- 4 7 jeer oo min saddex ah waa 21


T

- b $5 \times 3 = 15$
- t $7 \times 3 = 21$
- j $4 \times 3 = 12$
- x $9 \times 3 = 27$



2 Tirooyinka ku haboon sanduuqyada ku buuxiya

b



$3 + 3 + 3 + 3 = 12$

$\square \times \square = 12$


t



Saddexagal kasta wuxuu leeyahay saddex dhinac. Sadexagalada, Sawirka lagu muujiyay, dhammaan imisa dhinac ayey leeyhiin?

$\square \times \square = \square$.

3



Dhammaan tirada xiddiguhu waa $\square \times \square = \square$

4 Iskudhufta

b $2 \times 3 = \square$ **f** $7 \times 3 = \square$ **j** $6 \times 3 = \square$ **x** $0 \times 3 = \square$

kh $9 \times 3 = \square$ **d** $1 \times 3 = \square$ **r** $0 \times 3 = \square$ **s** $5 \times 3 = \square$

5 Iskudhufta

b

$$\begin{array}{r} 6 \\ \times 3 \\ \hline \end{array}$$

f

$$\begin{array}{r} 8 \\ \times 3 \\ \hline \end{array}$$

j

$$\begin{array}{r} 9 \\ \times 3 \\ \hline \end{array}$$

x

$$\begin{array}{r} 7 \\ \times 3 \\ \hline \end{array}$$

kh

$$\begin{array}{r} 10 \\ \times 3 \\ \hline \end{array}$$

LAYLIS 11

1 Shaxanada buugtiina intaad ku rogtiin buuxiya

b

b	$3 \times b$
7	
4	
10	
1	
6	

f

b	$b \times 3$
3	
8	
5	
0	
9	

2 Meelaha bannaan tirada ku haboon ku buuxiya

b Dhufsanaha 3 ee, ah ka horeeyaha 11 waa 9

f ka danbeeyaha 19 ee ah dhufsanaha 3 waa _____

j ka horeeyaha 29 ee dhufsanaha 3 ah waa _____

x Dhufsanayaasha 3 ee u dhexeeya 13 iyo 23 dhammaantood qora _____

Isuqaybinta Qaybshaheedu yahay 3

Hawlgalka-7

Bare Aadan ayaa abaal marin 12 buug u siiyay 3 arday oo fasalka 2^{aad} natiijo hor leh ka dhalisay waxbarashooda. Arday kasta imisa buug ayay qaybtiisu noqon (ama ayuu heli)?

$$12 \div 3 = 4$$

Natiijada isuqaybinta waxa lagu hubin karaa Iskudhufasho



$$4 \times 3 = 12$$

LAYLIS 12

1 Tirada xiddiguu waa imisa? _____



15 imisa kooxood oo min saddex ah ayaa ku jirta? _____

$$15 \div 3 = \underline{\hspace{2cm}}$$

2 21 imisa saddexaad ayey leedahay _____?

3 Isuqaybiya

b $6 \div 3 = \underline{\hspace{2cm}}$

x $9 \div 3 = \underline{\hspace{2cm}}$

r $3 \overline{)21}$

t $3 \div 3 = \underline{\hspace{2cm}}$

kh $27 \div 3 = \underline{\hspace{2cm}}$

s $3 \overline{)27}$

j $12 \div 3 = \underline{\hspace{2cm}}$

d $24 \div 3 = \underline{\hspace{2cm}}$

sh $3 \overline{)18}$

4 Mafrashaka buugta lagu raseeyo waxa kor yaala 12 buug. Mafrashku haddii uu leeyahay 3 khaandood khaanadii kasta imisa buug ayaa dhextaala?

5 Ardayda fasalka 2^{aad} tiradoodu waa 27. Ardaydu haddii ay isku abaabulaan, Kooxo ay tiradoodu, isleeg tahay oo kala ah kooxda sayniska, kooxda cilmiga bulshada iyo akhlaaqda iyo kooxda ka hortagga cudurka H. I. V ga. Kooxdii kasta imisa arday ayey yeelan?

2.3.2 Iskudhufashada 4 iyo Tiro kale Iyo Isuqaybinta Qaybshaheedu yahay 4

Iskudhufshada 4 iyo Tiro kale

Hawlgalka-8

b Xassan, khadra, Muuse iyo khadiija waa arday fasalka 2^{aad} ku jirta. Ardaydan wuxuu dugsigoodu mid kasta siiyey hal hal buug oo kala ah. Somali, Ingiriisi, Saynis, Xisaab iyo buug sawir; Afarta arday dhammaan imisa buug ayey dugsiga ka qaadatay?

	Xassan	Khadra	Muuse	Khadiisa
Somali	■	■	■	■
Ingiriisi	■	■	■	■
Saynis	■	■	■	■
Xisaab	■	■	■	■
Sawir	■	■	■	■
	5 buug	5 buug	5 buug	5 buug

Ardaydu dhammaan tirada buugagta ay qaadatay waa

$$5 + 5 + 5 + 5 = 20$$

$$4 \times 5 = 20$$


waxayna taasi ka dhigantahay 4 jeer oo min shan ah waa 20

† Meelaha bannaan dhufsanayaasha 4 ku buuxiya.

×	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10
4	4		12							40

Dhufsanayaasha afar

UFIRSADA




5 kooxood oo min afarah waa

$$4 + 4 + 4 + 4 + 4 = 20$$

waxayna ka dhigan tahay 5 jeer oo min 4 ah

$$5 \times 4 = 20$$



4 kooxood oo min shan ah waa

$$5 + 5 + 5 + 5 = 20$$

waxayna ka dhigan tahay 4 jeer oo min 5 ah

$$4 \times 5 = 20$$

Falka iskudhufashada haddii labada tiro ee la isku dhufanayo la kala hormariyo tarantoodu waa isku mid oo isma beddesho.

Tusaale 1

$$5 \times 4 = 4 \times 5 = 20$$

$$\begin{array}{r} 4 \\ \times 5 \\ \hline 20 \end{array}$$

$$\begin{array}{r} 5 \\ \times 4 \\ \hline 20 \end{array}$$

LAYLIS 13

1 Iskudhufta

b $6 \times 4 = \square$	t $4 \times 4 = \square$	j $9 \times 4 = \square$	x $1 \times 4 = \square$
kh $\begin{array}{r} 7 \\ \times 4 \\ \hline \end{array}$	d $\begin{array}{r} 10 \\ \times 4 \\ \hline \end{array}$	s $\begin{array}{r} 8 \\ \times 4 \\ \hline \end{array}$	sh $\begin{array}{r} 3 \\ \times 4 \\ \hline \end{array}$

2 Sanduuqyada bannaan buuxiya

b $4 \times 2 = 2 \times \square$	t $4 \times \square = 3 \times 4$	j $\square \times 4 = 4 \times 7$
x $3 \times \square = 5 \times 3$	kh $\square \times 4 = 4 \times 1$	

3 Raadi Qiimaha doorsomaha

b $t \times 4 = 24$	t $5 \times c = 20$	j $7 \times m = 28$
x $9 \times h = 36$	kh $4 \times d = 4$	d $5 \times 8 = 32$

4 Meelaha bannaan calaamadaha >, < ama = midda ku haboon ku buuxiya

b $6 \times 4 \underline{\hspace{1cm}} 25$	t $5 \times 4 \underline{\hspace{1cm}} 9 \times 3$	j $3 \times 6 \underline{\hspace{1cm}} 2 \times 9$
x $9 \times 4 \underline{\hspace{1cm}} 4 \times 9$	kh $8 \times 4 \underline{\hspace{1cm}} 30$	d $10 \times 4 \underline{\hspace{1cm}} 36$

5 dhufsanayaasha 4 ee u dhexeeya 13 iyo 39 qora:

4 8 12 _____, _____, _____, _____, _____, _____.

4×1 4×2 4×3 4×4 4×5 4×6 4×7 4×8 4×9

6 Yuusuf 5 neef oo geel ah ayuu leeyahay. lugaha geela dhammaantood waa imisa?

7 Ardayda fasalka 2^{aad} xiisada Isbortiga 4 saf inta ay isku safaan ayey garoonka Isbortiga tagaan. Safkii kasta haddii uu ka kooban yahay 10 arday. Tirada ardayda fasalku waa imisa?


T. Isuqaybinta Qaybshaheedu yahay 4

Hawlgalka-9

Xaashi wuxuu leeyahay 16 digaagadood. Weel digaagadaha biyo lagu waraabiyo waxaa lagu waraabin karaa 4 digaagadood. Xaashi digaagadihiisu dhamaantood in uu biyaha waraabiyo imisa weel ayuu u baahan yahay?

$$16 \div 4 = 4$$

16 marka aan u qaybinayno 4 si aan qaybta u helno waxaan raadinaynaa tirada marka 4 lagu dhufto ina siinaysa 16.



LAYLIS 14


b	$12 \div 4 = \underline{3}$	t	$20 \div 4 = \underline{5}$	j	$16 \div 4 = \underline{\quad}$	x	$28 \div 4 = \underline{\quad}$
kh	$4 \div 4 = \underline{\quad}$	d	$32 \div 4 = \underline{\quad}$	r	$0 \div 4 = \underline{\quad}$	s	$36 \div 4 = \underline{\quad}$

U fiirsada

Xidhiidhka ka dhexeeya iskudhufashada iyo isquqaybinta

ISUQAYBIN

b



Tidrada 12 imisa meelood oo min afar ah ayaa ku jirta?

$$12 \div 4 = 3$$

ISKUDHUFASHO




3 jeer oo min afar ah waa imisa?

3 jeer oo min afar ah waa $4 + 4 + 4 = 12$ ama


$$3 \times 4 = 12$$

t



Tirada 12 dhexdeeda imisa meelood oo min saddex ah ayaa kujirta?

$$12 \div 3 = 4$$



4 jeer oo min saddex ah waa imisa?

4 jeer oo min saddex ah waa

$$3 + 3 + 3 + 3 = 12 \text{ ama}$$

$$4 \times 3 = 12$$

Tusaalooyinka korka lagu muujiyay iyeda oo la adeegsanayo xarriiqda tirada waxay ina tusayaan xaqiiqooyinkan.

$12 \div 4 = 3$ waa run, waayo $3 \times 4 = 12$ waa run.

Sidoo kale $12 \div 3 = 4$ waa run waayo $4 \times 3 = 12$ waa run.

Weedha isquaybinta $12 \div 4 = 3$ dhexdeeda.


- tirada 12 waxaa layidhaahdaa la qaybse
- tirada 4 waxaa la yidhaahdaa qaybshe
- tirada 3 waxaa la yidaahdaa qayb.

Sidaas darteed

$laqaybshe \div qaybshe = qayb$

$laqaybshe \div qayb = qaybshe$


$aybshe \times qayb = laqaybshe$



iskuqaybinada $12 \div 4 = 3$ iyo $12 \div 3 = 4$ waa laba iskuqaybin oo lammaaneyaah ah.

U fiirsada shaxaha hoose

$4 \div 4 = 1$
$8 \div 4 = 2$
$12 \div 4 = 3$
$16 \div 4 = 4$
$20 \div 4 = 5$
$24 \div 4 = 6$
$28 \div 4 = 7$
$32 \div 4 = 8$
$36 \div 4 = 9$
$40 \div 4 = 10$



$1 \times 4 = 4$
$2 \times 4 = 8$
$3 \times 4 = 12$
$4 \times 4 = 16$
$5 \times 4 = 20$
$6 \times 4 = 24$
$7 \times 4 = 28$
$8 \times 4 = 32$
$9 \times 4 = 36$
$10 \times 4 = 40$

LAYLIS 15

1 Isuqaybiya: ka dibna tilmaama (oo qora laqaybshaha, qaybshaha iyo qaybta)

b	$20 \div 4 = 5$	t	$40 \div 4 = \dots$	j	$6 \div 2 = \dots$
	laqaybshe = ____		laqaybshe = ____		laqaybshe = ____
	qaybshe = ____		qaybshe = ____		qaybshe = ____
	qayb = ____		qayb = ____		qayb = ____

x	$12 \div 4 = \square$	kh	$4 \overline{)24} = \square$	d	$3 \overline{)27} = \square$
	laqaybshe = ____		laqaybshe = ____		laqaybshe = ____
	qaybshe = ____		qaybshe = ____		qaybshe = ____
	qayb = ____		qayb = ____		qayb = ____

r	$15 \div \square = 5$	s	$\square \overline{)18} \begin{matrix} 6 \\ \end{matrix}$	sh.	$\square \div 4 = 6$
	laqaybshe = ____		laqaybshe = ____		laqaybshe = ____
	qaybshe = ____		qaybshe = ____		qaybshe = ____
	qayb = ____		qayb = ____		qayb = ____

2 Buugagtiina ku roga kadibna dhammaystira

b	$28 \div 4 = \square$	t	$20 \div 4 = \square$	j	$12 \div 4 = \square$	x	$\square \times 4 = 28$
kh	$\square \times 4 = 20$	d	$\square \times 4 = 12$	r	$28 \div 7 = \square$	s	$20 \div 5 = \square$
sh	$12 \div 3 = \square$	dh	$\square \times 7 = 28$	c	$\square \times 5 = 20$	g	$\square \times 3 = 12$

3 Weedh kasta oo iskudhufasha ah waxa laga samayn karaa oo la socota laba weedhood oo isuqaybin ah oo lammaaneyaal ah.

TUSAALE: $6 \times 4 = 24$ sidaas darteed $24 \div 4 = 6$; Sidookale $24 \div 6 = 4$

b $8 \times 4 = 32$ sidaas darteed $32 \div 4 = 8$ sidoo kale $32 \div 8 = 4$

t $3 \times 4 = 12$ sidaas darteed $12 \div 4 = \dots$, $12 \div 3 = \dots$


j $9 \times 4 = 36$ sidaas darteed $36 \div 4 = \dots$, $36 \div 9 = \dots$

4 Meelaha bannaan calaamadaha '>', '<' ama '=' midda ku haboon ku buuxiya.

b 2×4 _____ $24 \div 4$ **t** $10 \div 2$ _____ $15 \div 3$

j 6×2 _____ $32 \div 4$ **x** 4×5 _____ $20 \div 2$

- 5 Axmad 28 Birr wuxuu ku iibsaday 7 buug, Halkii buug qiimaha uu ku taagan yahay waa imisa?
- 6 Saabuunta dharka lagu maydho middiiba (halkii midh) qiimaheedu waa afar Birr. Ardo 20 Birr imisa xabadood oo saabuun ah. ayey ku iibsan?
- 7 Tirada ka maqan goobaha buuxiya



Labalaab iyo rubuc

☞ *Tiro marka aan 2 ku dhufano taranka (dhufsanaha) aan helno waxaala yidhaahdaa labalaabka tiradaas*

$2 \times 3 = 6$ sidaas awgeed taranta 6 waa labalaabka tirada 3

☞ *Tiro marka aan 4 ku dhufano taranka (dhufsanaha) waxa la yidhaahdaa afar laabka tiradaas*

$4 \times 5 = 20$ sidaas awgeed taranka 20 waa afarlaabka tirada 5.

$4 \times 6 = 24$ sidaas awgeed 24 waa afarlaabka tirada 6

☞ *Tiro marka aan u qaybino 4 qaybta (natiijada) aan helno waxa la yidhaahdaa tiradaas rubuceeda*

$8 \div 4 = 2$ sidaas awgeed tirada 2 waa tirada 8 rubuceeda.

$20 \div 4 = 5$ sidaas awgeed tirada 5 waa tirada 20 rubuceeda.

LAYLIS 16

- 1 Meelaha bannaan tirada ku haboon ku buuxiya
- b** 8 afarlaabkeedu waa _____ **f** 12 rubuceedu waa _____
- j** 16 rubuceedu waa _____
- 2 Warsame da'diisu waa 10 jir. Da'da aabihiina waa da'da warsame afarlaabkeeda. Da'da Warsame aabihii waa imisa?
- 3 Muuse markuu tiriyeey lugaha geeliisa waxay noqotay 24. Muuse imisa geel ayuu leeyahay?
- 4 Xarun xannaanada caafimaad waxay bishii hore qaabishay 9 bukaan oo cudurka qaaxada qaba. bishanna waxay qaabishay tiradii bishii hore lablaabkeed. Haddaba, bishan tirada bukaanka ee ay qaabishay waa imisa?

2.3.3 Iskudhufashada, 5, 6 iyo Tiro kale Iyo Isuqaybinta Qaybshaheedu yahay 5 ama 6

B Iskudhufashada 5 ama 6 iyo Tiro kale

Hawlgalka-10



Baakidh kasta waxa ku jirta 5 qalin rasaas (qalin qori).

Guud haan tirada qalin rasaas waa imisa?

$$5 + 5 + 5 + 5 + 5 + 5 = 30$$


$$6 \times 5 = 30$$

U fiirsada $6 \times 5 = 30$ waxay ka dhigan tahay 6 shanaad waa 30

30 waa taranta 6 iyo 5.

6 iyo 5 isiro ayey u yihiin 30

30 waa dhufsanaha 5 sidoo kale 30 waa dhufsanaha 6.



kooxaha kuuluhu waa imisa? **3**.

Koox kasta imisa ayaa ku jirta? **6**.

Tirada kuushu dhammaanteed waa imisa? **18**.

Tiraab ahaan (afka) marka aan ku sheegno waxaan odhanaynaa saddex kooxood oo min lix ah waa toban iyo, siddeed. Waxaan u qoraynaa $3 \times 6 = 18$

- 18 waa taranta 3 iyo 6.
- 3 iyo 6 Isiro ama qaybshayaal ayey 18 u yihiin.
- 18 waa dhufsanaha 3, sidoo kale 6na dhufsane ayey u tahay

Meelaha bannaan buuxiya

Laba jeer oo min lix ah waa toban iyo laba: Waxa loo qoraa $2 \times 6 = 12$

4 jeer oo min lix ah waa 24. Waxaa loo qoraa $4 \times 6 = 24$

5 jeer oo min lix ah waa 30. Waxaa loo qoraa _____

7 jeer oo min lix ah waa _____. Waxaa loo qora _____

Shaxdan hoose meelaha bannaan dhufsanayaasha 6 ku buuxiya.

×	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10
6	6			24						

LAYLIS 17

Iskudhufta

1 **b** $4 \times 5 = \square$ **t** $6 \times 5 = \square$ **j** $10 \times 5 = \square$ **x** $5 \times 9 = \square$

kh $5 \times 10 = \square$ **d** $8 \times 5 = \square$ **r** $6 \times 0 = \square$ **s** $1 \times 5 = \square$

2 **b**
$$\begin{array}{r} 5 \\ \times 2 \\ \hline \end{array}$$
 t
$$\begin{array}{r} 7 \\ \times 2 \\ \hline \end{array}$$
 j
$$\begin{array}{r} 6 \\ \times 8 \\ \hline \end{array}$$
 x
$$\begin{array}{r} 6 \\ \times 5 \\ \hline \end{array}$$

3 Meelaha bannaan buuxiya

b 4 iyo 3 tarantoodu waa _____ **t** 8 iyo 6 tarantoodu waa _____

4 Meelaha bannaan calaamada '>' '<' ama '=' midda ku haboon ku buuxiya.

b $3 \times 6 \underline{\hspace{1cm}} 20$ **t** $0 \times 6 \underline{\hspace{1cm}} 0$ **j** $9 \times 5 \underline{\hspace{1cm}} 8 \times 6$

x $7 \times 5 \underline{\hspace{1cm}} 6 \times 6$ **kh** $5 \times 8 \underline{\hspace{1cm}} 4 \times 10$ **d** $6 \times 4 \underline{\hspace{1cm}} 4 \times 6$

5 Dhufsanayaasha 5 ee ilaa afartan iyo shan ku sugan qora.

5 10 15 _____, _____, _____, _____, _____, _____

1×5 2×5 3×5 4×5 5×5 6×5 7×5 8×5 9×5

6 Shaxahan hoose buugtiina intaad ku rogtiin buuxiya

b

j	x	j × x
5	9	
4	5	
3	5	
5	7	

t

c	c × 5
8	
4	
10	
6	

- 7 Fasalka 2^{aad} arday kasta waxa looga baahan yahay 6 buug oo uu casharada ku barto. 9 arday oo fasalka labaad ahi imisa buug ayay u baahanaanayaan?
- 8 Afar arday dhammaan farahooda labadooda gacmood waa imisa?
- 9 Xaliimo waxay leedahay 7 digaagadood. Digaagadiiba todobaadkii 6 ugaxood (ukumood) haddii ay dhasho xaliimo toddobaadkii imisa ugaxood ayay 7da digaagadood ka heli?

T Isuqaybinta Qaybshaheedu yahay 5 ama 6

Hawlgalka-11

Ardayda fasalka 2^{aad} tiradoodu waxay dhan tahay 30. Aroortii fasalka inta aynan galin horteed. 6 saf inta ay isu taagaan ayey heesta calanka qaadaan. Safkii kasta imisa arday ayaa ku jirta?

$$30 \div 6 = 5$$

Tirada 30 marka aan u qaybinayno 6 waxaan raadinaynaa tirada marka lagu dhufto 6 ina siinaysa 30.

Xusuusin

Isuqaybintu waxay leedahay laba calaamadood \div ama $)$

Tusaale 2

b $20 \div 4 = 5$ ama $4 \overline{)20}^5$

t $27 \div 3 = 9$ ama $3 \overline{)27}^9$

LAYLIS 18

1 Kuwan soo socda isuqaybiya

b $35 \div 5$

t $5 \div 5$

j $15 \div 5$

x $50 \div 5$

2 Kuwa soo socda isuqabiya. Ka dibna, natiijadu in ay sax tahay iskudhufasho ku hubiya.

Tusaale 3 $15 \div 3 = 5$ Sababtuna; $5 \times 3 = 15$

Sidoo kale; $4 \overline{)20}^5$ Sababtuna; $5 \times 4 = 20$

b $10 \div 5 = \square$ sababtuna \square

t $45 \div 5 = \square$ sababtuna \square

j $5 \div 5 = \square$ sababtuna \square

x $25 \div 5 = \square$ sababtuna \square

kh $14 \div 2 = \square$ sababtuna \square

d $42 \div 6 = \square$ sababtuna \square

r $54 \div 6 = \square$ sababtuna \square

s $6 \overline{)30} = \square$ sababtuna \square

sh $6 \overline{)24} = \square$ sababtuna \square

3 Shaxahan hoose buugtiina ku roga kadibna meelaha bannaan buuxiya.

b

x	15	40	25	35	0	20
$x \div 5$						

t

x	30	60	6	36	18	42
$x \div 6$						

LAYLIS 19

1 Raadi qiimaha doorsoomaha (astirada tirada uu u taagan yahay)

Tusaale 4

$x \div 6 = 3$, qiimaha doorsoomaha x waa 18 waayo $3 \times 6 = 18$

$24 \div t = 6$ marka ugu horreysa fiiri $24 = t \times 6$ sidaas darteed qiimaha doorsoomaha t waa 4 waayo $4 \times 6 = 24$

b $J \times 6 = 48$

t $d \div 4 = 8$

j $4 \overline{)r}^2$

x $48 \div t = 6$

kh $30 \div 6 = x$

d $36 \div x = 9$

r $x \overline{)6}^2$

s $b \times 6 = 24$

sh $3 \overline{)12}^t$

2 Safiya 5 kiilo oo basal ah ayey 35 Birr ku iibsatay. Halkii kiilo qiimihiisu waa imisa?

3 Xassan wuxuu qoyskiisa u soo iibiyey 15 hal oo muus ah. Cabdina wuxuu qoyskiisa u soo iibiyey 24 hal oo liin macaan ah.

b Qoyska reer xassan haddii uu 5 qof ka kooban yahay qof qofkasta imisa hal oo muus ah ayuu heli?

t Qoyska reer Cabdi haddii uu ka kooban yahay 6 qof imisa hal oo liin macaan ah ayuu qof kasta heli?

2.3.4 Iskudhufashada 7, 8, 9 iyo Tiro kale Iyo Isuqaybinta Qaybshaheedu yahay 7 ama 8 ama 9

B. Iskudhufashada 7, 8, 9 iyo Tiro kale.

Hawlgalka-12

Yonis wuxuu arkay afar dhaan oo gooni gooni u kala socota. Dhaankii kasta wuxuu ka koobanyahay toddoba awr. Yonis guud ahaan imisa awr ayuu arkay?

$$4 \text{ toddobo} = 7 + 7 + 7 + 7 = 28$$

$$\text{Sidaas awgeed; } 4 \times 7 = 28$$

Dhufsanayaasha la tilmaamay shaxaha meelaha ka bannaan ku buuxiya.

	×	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10
b											
Dhufsanayaasha 7	7	7	14					49			

	×	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10
t											
Dhufsanayaasha 8	8	8	16					56			

	×	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10
j											
Dhufsanayaasha 9	9	9	18					63			

LAAYLIS 20

1 Iskudhufta



b $2 \times 7 = \underline{\quad}$ **t** $3 \times 8 = \underline{\quad}$ **j** $4 \times 9 = \underline{\quad}$

x $9 \times 7 = \underline{\quad}$ **kh** $5 \times 8 = \underline{\quad}$ **d** $9 \times 6 = \underline{\quad}$

2

b 7	t 7	j 7	x 9	kh 6	d 10
×	×	×	×	×	×
2	8	7	6	8	9
_____	_____	_____	_____	_____	_____

3 Hal toddobaad wuxuu leeyahay 7 maalmood. 9 toddobaad imisa maalmood ayuu leeyahay?

4 Shaxdan hoose meelaha bannaan buuxiya idinka oo raacaya sida la idinku amray.

b	7 × b	8 × b	9 × b
5	35		
3		24	
0			
8			72
1			
10			
6			

5 Isbarbardhiga tirooyinka idinka oo meelaha bannaan ku buuxinaya calaamaddaha “>”, “<” ama “=”

- b** 7×8 _____ 50 **t** 0×9 _____ 8×0 **j** 3×8 _____ $72 - 48$
x 2×9 _____ 8×2 **kh** 8×9 _____ 7×10 **d** 0×9 _____ 7×0

LAYLIS 21

Meelaha bannaan tirooyinka ku haboon raadsha oo ku buuxiya

1 **b** $0 \div 7 \div 14 \div$ _____ _____ _____ _____ 49 _____

t $72, 64, 56, \underline{\hspace{1cm}}, \underline{\hspace{1cm}}, \underline{\hspace{1cm}}, \underline{\hspace{1cm}}, \underline{\hspace{1cm}}$
 $9 \times 8 \quad 8 \times 8 \quad 7 \times 8 \quad 6 \times 8 \quad 5 \times 8 \quad 4 \times 8 \quad 3 \times 8 \quad 2 \times 8 \quad 1 \times 8$

2 Qaybah ee ayaa jawaabo isku mid ah leh?

b	B 7 ×3	T 7 ×4	J 7 ×5	X 7 ×6	KH 7 ×7	D 4 ×7	R 6 ×7	S 5 ×7
	B 8 ×4	T 8 ×5	J 8 ×6	X 8 ×7	KH 4 ×8	D 7 ×8	R 5 ×8	S 6 ×8

3 Qof ciyaaraha isboortiga ciyaara ayaa maalin kasta, orda 7 kilo mitir orod tababar ah. Tababarkaas haddii uu 8 maalmood sameeyo Imisa kilomitir ayuu orday?

3 Shaxahan buugagtiina ku roga ka dibna buuxiya

b

t	t ÷ 7
35	
0	
14	
42	
21	

t

c	d	c ÷ d
24	8	
70	7	
0	9	
35	7	
27	9	

- 4 Bare Cusmaan ayaa 7 arday u qaybiyey 35 buug. Imisa buug ayuu ardaygii kasta helayaa?
- 5 Hal buug ayey qiimadiisu tahay 8 Birr. 72 Birr imisa buug ayaa lagu iibsan karaa?
- 6 Dhufsanayaasha 9 ee ilaa 90 ku sugan qora?

LAYLIS GUUD

1 Shaxdan buuxiya

×	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10
1	1		3	4	5	6		8		10
2	2		6	8			14		18	
3		6			15			24		
4		8			20				36	
5						30			45	
6				24				48		
7	7						49			70
8				32			56			
9		18				54				
10		20								100

2 Ufiirsada shaxda sare. Ka dibna shaxda ka soo saara taranta

- b** $3 \times 8 = \square$ **t** $7 \times 1 = \square$ **j** $6 \times 5 = \square$ **x** $3 \times 6 = \square$
- kh** $1 \times 9 = \square$ **d** $7 \times 9 = \square$ **r** $2 \times 9 = \square$ **s** $8 \times 8 = \square$
- sh** $10 \times 9 = \square$ **c** $7 \times 5 = \square$ **q** $4 \times 10 = \square$

3

b	$\begin{array}{r} 3 \\ \times 8 \\ \hline \end{array}$	t	$\begin{array}{r} 7 \\ \times 8 \\ \hline \end{array}$	j	$\begin{array}{r} 8 \\ \times 7 \\ \hline \end{array}$	x	$\begin{array}{r} 6 \\ \times 5 \\ \hline \end{array}$	kh	$\begin{array}{r} 6 \\ \times 1 \\ \hline \end{array}$
----------	--	----------	--	----------	--	----------	--	-----------	--

4 Isuqaybiya idinka oo fiirinaya shaxda su'aasha 1^{aad} ku taala

b $12 \div 2 = \square$	t $24 \div 4 = \square$	j $42 \div 6 = \square$	x $36 \div 4 = \square$
kh $10 \div 5 = \square$	d $3 \div 3 = \square$	r $16 \div 8 = \square$	s $28 \div 7 = \square$
sh $35 \div 7 = \square$	dh $56 \div 8 = \square$	c $45 \div 9 = \square$	g $5 \div 1 = \square$
f $8 \div 8 = \square$	n $80 \div 8 = \square$	m $12 \div 4 = \square$	

5 Raddi qaybta

b $7 \overline{)63}$	t $9 \overline{)54}$	j $7 \overline{)21}$	x $8 \overline{)32}$
kh $6 \overline{)48}$	d $9 \overline{)81}$	r $7 \overline{)35}$	s $6 \overline{)54}$
sh $8 \overline{)8}$	dh $9 \overline{)36}$	c $5 \overline{)20}$	g $7 \overline{)49}$

6 Qiimaha doorsoomaha raadiya

b $n \times 6 = 24$	t $9 \times c = 72$	j $7 \times c = 56$
x $9 \times c = 36$	kh $5 \times n = 0$	d $c \times 10 = 90$

7 Maxamuud wuxuu leeyahay shan jeeb. Jeebkii kasta haddii ay 8 Birr ugu jirto dhammaan inta Birr uu haystaa waa imisa?

8 Hal buug qiimihiisu waa 8 Birr. 9 buugna qiimahoodu waa imisa?

Cutubka

3aad



CABBIRAADDA


3.1 DHERERKA OO LAGU CABBIRAYO SENTIMITIR “sm” IYO MITIR “m”

Hawlgalka - 1




U fiirsada sawirada hoos ku sawiran. Sawir kasta sheega cabbirka ku haboon

Tusaale

qalin qoriga dhererkiisu waa 13sm




Walxahan ku cabbira mastarad

- 1  sm
- 2  sm
- 3  sm

- 4 Sheega halbeegga dhererka ee ku haboon cabbiridda waxyaalahan hoos ku tilmaaman.
- b Dhererka qalin qoriga
 - t Dhererka beer dhinaceeda
 - j Fasalka aad wax ku baratiin dhererka dhinacyadiisa
 - kh Joogga iyo dhererka miisaskiina.
 - d Dhererka iyo ballaca garoonka kubbadda gacanta
- 5 Halbeegyadee ayaa cabbiridda dhererka ku haboon?

XUSUUSTA

- Halbeeg saleedka dhererku waa mitir
- 1 Mitir = 100 sentimitir
- Mitir marka la soo gaabiyo waxa loo qoraa 'm' Sentimitir marka la soo gaabiyo waxaa loo qoraa 'sm'




Hawlgalka-2

Idinka oo koox koox ah walxaha shaxdan hoose lagu tilmaamay intaad mitir ku cabbirtaan. Ka dibna jawaabihiina barihiina tusa


	Dherer	
	Mitir	Saantimitir
Joogga kuraasta aad ku fadhiisataan		
Dhererka miiska aad ku dul qorataan		
Joogga arday kooxdiiina ka tirsan		
Dhererka garoonka kubbadda cagta		
Ballaca iyo dhererka fasalkiina		

3.2 ISUGAYNTA IYO KALAGOYNTA CABBIRADA DHERERKA SENTIMITIR “sm” AMA MITIR “m”



Hawlgalka-3

Xariijimahan soo socda dhererkooda mastarad ku cabbira ka dibna isugeeya cabbirka dhererkooda.



- b** Marka la isugeeyo dhererka xarriijinta madow iyo ta doogada ah
 _____ sm + _____ sm = _____ sm
- t** marka la isugeeyo dhererka xarriijinta doogada ah iyo ta buluuga ah
 _____ sm + _____ sm = _____ sm
- j** Marka la isugeeyo dhererka xarriijinta cas iyo ta madowga ah
 _____ sm + _____ sm = _____ sm
- x** marka la isugeeyo dhererka xarriijinta cas iyo ta buluuga ah.
 _____ sm + _____ sm = _____ sm

LAYLIS 1

Kuwan soo socda ka shaqeeya

- | | | |
|-------------------------------|-----------------------|---------------------------------------|
| 1 b 32sm + 42sm | t 42sm + 18sm | j 39sm + 17sm |
| x 26m + 47m | kh 48sm + 21sm | d 52m + 39m |
| 2 b 45sm – 32sm | t 23sm – 19sm | j 34m – 17m x 59m – 46m |

- 3 Xaliimo waxay iibsatay dhar 37m ah. Sidoo kale Caashana waxay iibsatay dhar 52m ah.
- b** Labada gabdhood imisa mitir oo dhar ah ayay iibsadeen?
- t** Gabadhee ayaa dhar dheer iibsatay? Imisa mitirayey dharku kala dheer yahiin?
- 4 Sacaada dhererkeedu waa 72sm. Cumar dhererkiisu ka Sacaada 14sm ayuu ka dheer yahay.
- b** Cumar dhererkiisu waa imisa sm?
- t** Dhererka Sacaada iyo ka Cumar marka la isugeeyo waa imisa?

3.3 MUGGA DAREERAHA OO LAGU CABBIRAYO LITIR


Hawlgalka-4

- 1 Saliidda marka aad dukaanka ka soo iibsanaysaan dukaanluhu muxuu saliidda idinku miisaa (cabbiraa)?
- 2 Gaaska shidaalka marka la gadayo maxaa lagu cabbiraa?

XUSUUSTA

- Halbeegga lagu cabbiro mugga dareeraha waxaa la yidhaahdaa litir
- litir marka la soo gaabiyo waxaa loo qoraa 'ℓ' ama 'L'

3.4 ISUGAYNTA IYO KALAGOYNTA LITIRKA



LAYLIS 2

Kuwan soo socda ka shaqeeya.

1 **b** $16\ l + 22\ l = \underline{\hspace{2cm}}$ **t** $27\ l + 15\ l = \underline{\hspace{2cm}}$
j $26\ l + 23\ l = \underline{\hspace{2cm}}$ **x** $45\ l - 13\ l = \underline{\hspace{2cm}}$

2 Xaawo waxay ka shaqaysaa dukaan gaaska lagu gado. Maalintii Isniinta 15 litir Arbacadii 25 litir maalinta khamiistiina 18 litir oo gaas ah ayay gaday. Xaawo saddaxdaa maalmood dhaman imisa litir oo gaas ah ayay gaday?


3 Xasan saciisa maalin kasta wuxuu ka lisaa 8 litir oo caana ah. Toddobaadkii imisa litir ayaa laga lisi?

4 Fenuus hal litir oo gaas ah marka lagu shubo 8 saac ayaa la iftiinsadaa. Feynuuska in 72 saacadood la iftiinsado imisa litir oo gaas ah ayaa loo baahan?

3.5 CULAYSKA OO LAGU CABBIRAYO KIILOGARAAM

Hawlgalka-5


- 1 Sheega midka culus.
 - b** Buugga aad xisaabta ka barataan iyo buugga aad xisaabta ku qortaan
 - t** Qalin qorigiina iyo masaxaada sabuurada
- 2 Ka dibna idinka oo adeegsanaya miisaan dhab ah ama miisaan uu barihiinu diyaariyey, xaqiijiya qiyaastaad sheegteen.



XASUUSTA

Kiilogaraam waa halbeegga lagu cabbiro culayska. Marka la soo gaabiyo waxa loo qoraa "kg".

Niis ama qururux miisaankoodu yahay 1 kg, 2 kg, iyo badh kg soo gunta oo fasalka keena. Ka dibna idinka oo kuwaas adeegsanaya walxo kale miisaama oo culayskooda sheega.



3.6 ISUGAYNTA IYO KALAGOYNTA HALBEEGGA CULAYSKA KIILOGARAAM (kg)

Tusaale 1



$$12 \text{ kg} + 18 \text{ kg} = 30 \text{ kg}$$

Tusaale 2



$$46 \text{ kg} - 24 \text{ kg} = 22 \text{ kg}$$

LAYLIS 3


Ka shaqeeya kuwan soo socda.

- 1

b 46 kg + 45 kg	t 38 kg – 23 kg	j 23 kg + 47 kg
x 42 kg + 35 kg	kh 86 kg – 27 kg	
- 2 Hooyo khadra waxay suuqa ka soo iibsatay 25 kg hadhuudh ah 56 kg qamadin ah iyo 23 kg galley ah.
 - b** Hooyo khadra hadhuudhka iyo galleyda ay soo iibsatay wadartoodu waa imisa kg?
 - t** Hooyo khadra hadhuudhka iyo qamadiga ay soo iibsatay wadartoodu waa imisa kg?
 - j** Hooyo khadra qamadiga ay soo iibsatay imisa kg ayuu ka badanyahay galleyda ay soo iibsatay?
- 3 Culayska Khadiija waa 35 kg. Culayska Cabdina waa 42 kg.
 - b** Culayska cabdi imisa kg ayuu ka badan yahay culayska khadiija?
 - t** Culayska Cabdi iyo culayska khadiija marka la isugeeyo waa imisa kg?

Cutubka

4aad



BARASHADA JAJABYADA

4.1 NAKHTIINKA NUSASKA (BADHADHKA) IYO RUBUCYADA

XUSUUSTA




- Marka shay idil (hal shay ama hal walax) aynu u kala qaybino dhawr qaybood oo isleeg qaybta aan helno waxaa la yidhaahdaa jajab
- Marka shay idil aynu kala qaybino laba meelood oo isleeg qayb kastaba waxaa loo yaqaana badh (NUS)
- Sidoo kale marka shay idil aynu u kala qayqaybino afar meelood oo isle'eg qayb kasta waxaa la yidhaahdaa rubuc. (shayga rubuciisa)

Tusaale 1


b	Qaybta la midabeeyey waa goobada badh keeda (nuskeeda)	
t	Qaybta la midabeeyey waa goobada rubuceeda.	

Hawlgalka-1

Tusa idinka oo hadhaynaya (madoobaynaya).






Tusale 2



Hawlgalka-2

Xidhiidhka ka dhexeeya rubuca iyo badhka (nuska) ku muujiya sawirradan hoose idinka oo madoobaynaya qaybaha ay sawirradu ka kooban yihiin.



4.2 SADDEX DALOOLKA WALXAHA

Hawlgalka-3

Warqad qaabkeedu laydi yahay saddex qayb > (3laab) oo is le'eg u laab. Qaybtii kasta waxaa la yidhaahdaa saddex meelood meel (saddex – dalool – hal)

Tusaale

U fiirsada sawiradan hoos lagu muujiyey. Qaybaha la qalimeeyay waa saddax daloolka walxaha.


b



t




j



LAYLIS 1


1 Shaxannada hoos kuxusan buugagtiina marka aad ku rogtiin dabadeed sida la idin faray idinka oo raacaya shaxan kasta rubucii ama badhkii hadheeya (madoobeeya).

b




Rubuc madoobeeya

t




Badh madoobeeya

j




Badh madoobeeya

x




Rubuc madoobeeya

kh




Rubuc madoobeeya

d



Badh madoobeeya


r



Rubuc madoobeeya


- 2 Shaxannada hoose buugtiina ku roga, ka dibna sida la idin faray saddax meelood meel iyo saddex meelood laba madoobeeya. Shaqadiinana barihiina (macaliinkiina) tusa.

b




Saddex-meelood meel

t




Saddex-meelood laba

j



Saddex-meelood laba

x




Saddex-meelood meel

kh



Saddex-meelood laba

d




Saddex-meelood laba

4.3 WALAXDA IYO JAJABYADA (ASTIRADA JAJABYADA WALAXDA)

Tusaale

Shaxannada hoos ku sawiran waxaa loo kala qaybiyey laba, saddex iyo afar qaybood oo isle'eg u fiirso qaybta la ma astirada jajabka ee lagu tilmaamay.

b




$$= \frac{1}{4}$$

t



$$= \frac{3}{4}$$

j




$$= \frac{1}{2}$$


Hawlgalka-4

Shaxannada hoos ku xusan sabuurada intaad ku sawirtiin qaybaha la midabeeyey astiro ku muujiya


1




2



3



4



5



6



7










LAYIS 2

1 shaxda hoose meelaha bannaan ku buuxiya erayo tilmaamaya jajabka la siiyey ama astirada jajabka erayada lagu cadeeyey.

Erayo tilmaamaya jajab	Astirada jajabka
Laba meelood meel	$\frac{1}{2}$
Afar-meelood laba	$\frac{2}{4}$
Saddex-meelood meel	
	$\frac{5}{4}$
Saddex-meelood-laba	
	$\frac{5}{6}$
Lix dalool-saddex	
Afar dalool hal	

2 Shaxannada hoos ku sawiran mid kasta qaybta la midabeeyay iyo qaybta aan la midabaynin ku qora erayo iyo astiro.

	Qaybta la midabeeyay	Qaybta aan la midabaynin
b	 <p>Erayo: Afar-meelood meel Astiro; $\frac{1}{4}$</p>	<p>Erayo: Afar meelood saddax Astiro; $\frac{3}{4}$</p>
f	 <p>Erayo; _____ Astiro; _____</p>	<p>Erayo; _____ Astiro; _____</p>
j	 <p>Erayo; _____ Astiro; _____</p>	<p>Erayo; _____ Astiro; _____</p>
x	 <p>Erayo; _____ Astiro; _____</p>	<p>Erayo; _____ Astiro; _____</p>
kh	 <p>Erayo; _____ Astiro; _____</p>	<p>Erayo; _____ Astiro; _____</p>
d	 <p>Erayo: _____ Astiro: _____</p>	<p>Erayo: _____ Astiro: _____</p>
r	 <p>Erayo: _____ Astiro: _____</p>	<p>Erayo: _____ Astiro: _____</p>

Cutubka

5aad

$$\begin{array}{r} 209 \\ 782 \\ 1000 \\ \hline 250 + 7 = 257 \\ \hline 600 \quad 999 \end{array}$$


TIROOYINKA IDIL ILAA 1000

5.1 DHUFSANEYAASHA 100 ILAA 1000




Tusaale 1

Fiiriya Jaajuurka la is dul raseeyey



$$100 = 1 \times 100$$



$$200 = 2 \times 100$$

UFIIRSADA

Dhufsaneyaasha 100 ilaa 1000 gaarsiisan waa kuwan hoos ku qoran.

$$100 = 1 \times 100$$

$$200 = 2 \times 100$$

$$300 = 3 \times 100$$

$$400 = 4 \times 100$$

$$500 = 5 \times 100$$

$$600 = 6 \times 100$$

$$700 = 7 \times 100$$

$$800 = 8 \times 100$$

$$900 = 9 \times 100$$

$$1000 = 10 \times 100$$

LAYLIS 1

1 Shaxdan hoos ku xusan dhufsaneyaasha 100 ee ka maqan buuxiya.

x	1	2	3	5	6	9
100	100			500		1000


2 Erayo ku qora (tiraab)

b	100 <u>hal boqol</u>	t	300 <u>saddex boqol</u>	j	600 _____
x	200 _____	kh	800 _____	d	400 _____
r	900 _____	s	500 _____	sh	1000 _____

3 Tiro (astiro) ku qora

b	afar boqol <u>400</u>	t	laba boqol _____	j	toddoba boqol _____
x	sagaal boqol _____	kh	Shan boqol _____	d	Saddex boqol _____

4 Dhufsaneyaasha 100 ee maqan buuxiya.



5 Shaxahan hoos ku xusan buugagtiina ku guuriya dabadeena Buuxiya.

b	<table border="1"> <thead> <tr> <th>t</th> <th>t × 100</th> </tr> </thead> <tbody> <tr> <td>2</td> <td></td> </tr> <tr> <td>7</td> <td></td> </tr> <tr> <td>4</td> <td></td> </tr> <tr> <td>3</td> <td></td> </tr> <tr> <td>6</td> <td></td> </tr> </tbody> </table>	t	t × 100	2		7		4		3		6		t	<table border="1"> <thead> <tr> <th>x</th> <th>x × 100</th> </tr> </thead> <tbody> <tr> <td></td> <td>300</td> </tr> <tr> <td></td> <td>500</td> </tr> <tr> <td></td> <td>200</td> </tr> <tr> <td></td> <td>600</td> </tr> <tr> <td></td> <td>800</td> </tr> </tbody> </table>	x	x × 100		300		500		200		600		800
t	t × 100																										
2																											
7																											
4																											
3																											
6																											
x	x × 100																										
	300																										
	500																										
	200																										
	600																										
	800																										

Tusaale 2

Dhammaan imisa kiilogaraam oo sonkor ah ayaa jooniyadaha dhexdooda ku Jirta?



$$100 + 100 + 100 = 200 + 100 = \underline{300}$$

Sidaas darteed 300 kg oo sonkor ah ayaa jooniyadaha ku Jirta.

LAYLIS 2

1 Meelaha bannaan buuxiya.

b Afar boqol iyo hal boqol waa shan boqol.

t Lix boqol iyo hal boqol waa toddoba boqol.

j Saddex boqol iyo hal boqol waa _____ boqol.

x _____ boqol iyo hal boqol waa sagaal boqol.

kh Shan boqol iyo saddex boqol waa siddeed boqol.

d Saddex boqol iyo laba boqol waa _____ boqol.

2 Isugeeya

b $400 + 100 = \underline{\quad}$ **t** $600 + 100 = \underline{\quad}$ **j** $500 + 100 = \underline{\quad}$

x $800 + 100 = \underline{\quad}$ **kh** $100 + 300 = \underline{\quad}$ **d** $900 + 100 = \underline{\quad}$


r $500 + 300 = \underline{\quad}$ **s** $200 + 100 = \underline{\quad}$ **sh** $400 + 200 = \underline{\quad}$

3 Meelaha bannaan dhufsaneyaasha 100 ee ku haboon ku buuxiya.

b $200 = \underline{\quad} + \underline{\quad}$ **t** $600 = 200 + \underline{\quad}$ **j** $700 = 300 + \underline{\quad}$

x $800 = \underline{\quad} + 600$ **kh** $900 = 400 + \underline{\quad}$ **d** $1000 = 700 + \underline{\quad}$

5.2 BARASHADA TIROOYINKA IDIL 101 ILAA 1000



Hal boqol oo ah saddex jibbaarneyaal
isku dheggan iyo hal saddex jibbaarane

waa hal boqol iyo hal

$$100 + 1 = 101$$



hal boqol oo Birr iyo laba Birr

$$100 + 2 =$$

hal boqol iyo laba Birr

102

Tusaale 1

b

Tiro lagu qoray astiro	Tiro lagu qoray Erayo
100	boqol
101	boqol iyo hal
102	boqol iyo laba
103	boqol iyo saddex
104	boqol iyo afar
105	boqol iyo shan
106	boqol iyo lix
107	boqol iyo toddoba
108	boqol iyo siddeed
109	boqol iyo sagaal

t

Tiro lagu qoray astiro	Tiro lagu qoray erayo
207	Laba boqol iyo toddoba
408	Afar boqol iyo siddeed
503	Shan boqol iyo saddex
606	Lix boqol iyo lix
705	Toddoba boqol iyo shan
707	Toddoba boqol iyo toddoba
709	Toddoba boqol iyo sagaal
902	Sagaal boqol iyo laba
909	Sagaal boqol iyo sagaal

LAYLIS 3

1 Tirooyinka soo socda erayo ku qora. Ka dibna codkiina kor inta aad u qaadiin akhriya.

b 301 **t** 701 **j** 901 **x** 407 **kh** 607

d 804 **r** 505 **s** 209 **sh** 902

2 Tirooyinkan soo socda tiro ku qora

b laba boqol iyo toddoba

kh toddoba boqol iyo sagaal

t saddex boqol iyo saddex

d siddeed boqol iyo saggaal

j Afar boqol iyo shan

x Lix boqol iyo laba

3 Tirooyinkan hoos ku xusan ereyo ku qora. Ka dibna codkiina kor u qaada oo akhriya.

b	505	t	432	j	399	x	196
kh	684	d	555	r	988	s	158
sh	534	dh	719	c	990	g	119


4 Tirooyinkan hoos ku tilmaaman. astiro ku qora.

- b** Afar boqol toban iyo shan
- t** Lix boqol konton iyo siddeed
- j** Sagaal boqol afartan iyo afar
- x** toddoba boqol siddeetan iyo siddeed
- kh** Lix boqol siddeed iyo konton

Isugeynta Tiro hal-god ah iyo Dhufsaneyaasha 100.

Tusaale 2

b



Ama $2 \times 100 + 5 = 205$

t $400 + 6 = 406$

$4 \times 100 + 6 = 406$

U fiirsada Marka aan isugeyno tiro 1-god ah iyo tiro ah dhufsanaha 100 eberka u dambeeya waxaa lagu beddala tirada hal godleyda ah.

Hawlgalka-1

Tirada 503 u qora wadar ka kooban tiro ah dhufsanaha 100 iyo tro l-god ah.

Tusaale 3

$$206 = 200 + 6$$

LAYLIS 4

1 Isuggeeya

b $300 + 5 = \underline{\quad}$

t $200 + 6 = \underline{\quad}$

j $500 + 3 = \underline{\quad}$

x $900 + 4 = \underline{\quad}$

2 Meelaha bannaan tirada ku haboon ku buuxiya

b $405 = \underline{\quad} + 5$

t $608 = 600 + \underline{\quad}$


j $704 = 700 + \underline{\quad}$

x $307 = \underline{\quad} \times \underline{\quad} + \underline{\quad}$

Tusaale 4











3 Indinka oo tusaalaha 3^{aad} raad raacaya meelaha bannaan buuxiya.




5.3 QIIMA RUGEEDKA TIROOYINKA IDIL ILAA 1000

Rugta Boqlaadka, Tobnaadka iyo Koowaadka

1kaardh (1 xabo ama Koowaad)		
6 kaadh (6 xabadood ama 6 halhalo)		
10kaardh (10 Koowaad ama 10 xabadood)		
Kaardh 1 Tobnaad ah. Wuxuu ka kooban yahay 10 koowaad oo isku dhagan.		
Sidaas darteed 10 koo waad waxay la mid tahay 1 tobnaad		
AMA	10 koowaad	= 1 tobnaad
10Tobnaad = 1 Boqlaad		
	10 tobano	= 1 boqol

Tusaale 1

U fiirsada tirada sawirka lagu muujiyey



Imisa kaadh oo boqlaad ah? **3**

Imisa koowaad ah? **4**

3 Boqlaad 2 tobnaad iyo **4** koowaad ah? ama $300 + 20 + 4 = 324$

Sidaas darteed $324 = 300 + 20 + 4$

Imisa kaadh oo tobnaad ah? **2**

Ku qor astiro **324**

Hawlgalka-2

Idinka oo raad raacaya tusaalaha buuxiya meelaha bannaan.

b 2 Boqlaad 3 Tobnaad iyo 5 Koowaad ama $200 + 30 + 5 = 235$

t ___ Boqlaad _____ Tobnaad _____ Koowaad.

j _____ + _____ + _____ = _____


x $123 = 100 + 20 + 3$

kh $345 = \underline{\quad} + \underline{\quad} + \underline{5}$

d $645 = \underline{\quad} + \underline{\quad} + \underline{\quad}$

r $827 = \underline{\quad} + \underline{\quad} + \underline{\quad}$

Tusaale 2



Jaantuska dhinaca bidixda ku yaala waa qalabka loo yaqaano abaakas. Waxaa loo diyaariyey in lagu muujiyo qiima-rugeed ka tirooyinka.

Sida aad ku argtaan godka koowaad ka 2 kuulood, godka tobnaadka 3 kuulood.

Godka boqolaadka 2 kuulood ayaa dul yaala.

Sidaas darteed tirada qalabka lagu muujiyey waxay tilmaamaysaa.

2 Boqlaad 3 tobnaad iyo 2 koowaad

Marka astiro loo qoro waa 232. Tiradani waa tiro 3- astiroole ah. Astirada 2 ee tirada dhinaceeda bidix ku taalaa qiima rugeedkeedu (qiimaha-jagadeedu) waa 100, sidaas darteedna qiimaheedu waa 200. Sidoo kale godka astirada 3 qiima rugeedkeedu waa 10, qiimaheeduna waa 30.

Astirada 2 ee tirada 232 dhinaceeda midig ku taalaa qiima-rugeedkeedu waa 1, (Hal) qiimaheeduna waa 2 (laba koowaad).

U FIIRSADA

Tirada 232 dhexdeeda astirooyinka dhinaca bidixda iyo dhinaca midigta ku yaalaa waa isku mid, hase yeeshee, qiima rugeedkoodu way kala duwan yihiin. Sidaas darteed na qiimahoodu way kala duwan tihiin.

LAYLIS 5

1 Tirooyinka la idin siiyey abaakaska dushiisa ku muujiya.

b 324

Boqlaadka Tobnaadka Koowaadka

t 326

Boqlaadka Tobnaadka Koowaadka

XUSUUSTA

- 109 way ka weyn tahay 108. Weedhan marka calaamad (asaan) lagu qoro waxaa loo qoraa $109 > 108$.
- 106 way ka yar tahay 107. Weedhan marka calaamad (asaan) lagu qoro sidan ayaa loo qoraa
 $106 < 107$
- 105 iyo 110 tirooyinka u dhexeeya sidey u kala horeeyaan marka loo qoro, waxay yihiin 106, 107, 108, iyo 109.

LAYLIS 6


Tusaalaha kor ku xusan raad raaca oo ka shaqeeya



- 1 **b** Ka horeeyaha 201 waa tirada _____
t Ka dambeeyaha 206 waa tirada _____
j 207 ka horeeyaheedu waa _____ ka danbeeyaheeduna waa _____
- 2 Tirooyinkan hoos ku qoran mid kasta raadiya ka horeeyaheeda iyo ka dambeeyaheeda.
b 304 **t** 506 **j** 127 **x** 243
kh 119 **d** 849 **r** 999
- 3 xarriiqda tirada intaad buugagiina ku sawirtaan labada tiro ee la idin siiyay tirooyinka u dhexeeya sidey u kala horeeyaan u qora.
b 100 iyo 105 **t** 203 iyo 208 **j** 309 iyo 315
x 500 iyo 506 **kh** 607 iyo 612 **d** 790 iyo 796
- 4 Meelaha bannaan calaamadaha '>' '<' ama '=' midda ku haboon ku buuxiya.
b 786 _____ 684 **t** 407 _____ 407 **j** 640 _____ 643
x 234 _____ 221 **kh** 846 _____ 342 **d** 323 _____ 325

Cutubka

6aad




BARAHA XARRIIQAHA IYO SHAXANNO KALE

6.1 SAWIRIDDA XARRIIQAHA TOOSAN

6.1.1 Baraha

Hawlgalka-1

Buugagtiina dusheeda dhawr meelood qalin ku calaamadeeya. Baraha aad calaamadayseen, xafo ku magacaaba ka soo qaada sida; B, M, X iyo J.




LAYLIS 1

1 Baraha hoos ku sawiran buugagtina ku guuriya. Ka dibna idinka oo mastarad adeegsanaya isku xidhiidhiya oo sawira xarfaha la tilmaamay.

	W		H
	T		V
	X		K

2 Baraha hoos ku tilmaaman buugagttiina ku guuriya. Kadibna idinka oo adeegsanaya mastarad laba barood oo walba isku xidhiidhiya oo sawira xariiq toosan oo dhexmeraya labada barood.



3 Baraha su'aasha 2 (b, t iyo j) lagu tilmaamay marka aad labad kasta isku xidhiidhiseen imisa xariiqo toosan ayaad sawirteen?

6.1.2 Xidhiidhka ay Leeyihiin Baruhu Iyo Xarriiqaha Toosan

Tusaale

Fiiriya xarriiqan toosan ee lagu magacaabay 'm'



- Baraha B, T, J iyo X waxay dul dhacaan xarriiq toosan ee 'm'
- Xarriiq toosan ee 'm' wuxuu dhexmaraa baraha B, T, J iyo X
- Barta T waxay u dhexeysaa baraha B iyo J
- Barta D meel xarriiq toosan ee 'm' ka sarraysa ayey ku taala barta R na waxay ku taalaa meel xarriiq ka hooseysa.

LAYLIS 2


1 Weydiimahan soo socda buugagttiina ku guuriya. Ka dibna meelaha bannaan buuxiya idinka oo raad raacaya sharaxaada tusaalaha sare



- b** Baraha _____ waxay ku taalameel xarriiq 'r' ka saraysa.
- t** Baraha _____ iyo _____ waxay dul dhacaan xarriiq toosan ee 'r'

- j** Xarriiqaha toosan ee 'r' wuxuu dhexmaraa baraha _____ iyo
- x** Barta _____ waxay u dhexeysaa barta _____ iyo _____
- kh** Barta _____ meel xarriiqaha toosan ee 'r' _____ ayay ku taalaa. Barta M na waxay ku taala meel xarriiqaha ka _____

2




- b** _____ iyo _____ waa baro dul dhaca xarriiqaha toosan ee 'n'
- t** Xarriiqaha toosan 'n' wuxuu dhexmaraa baraha _____ iyo _____
- j** Barta T waa bar u dhexeysa barta _____ iyo _____
- x** Baraha B iyo X waxa u dhexeeyaa baraha _____ iyo _____

6.1.3 Xidhiidhka ka dhexeeya xarriiqaha toosan

Tusaale


Ufiirsada xarriiqaha toosan ee 'r' iyo 's' ee dhinaca midigta ku sawiran. Labada xarriiq waa laba xarriiq oo isgoynaya. Xarriiqaha toosan ee 'r' wuxuu dhexmaraa barta c. sidoo kale xarriiqaha toosan ee 's' wuxuu dhexmaraa barta c.



Sidaas datreed labada xarriiq 'r' iyo 's' waxay wadaagaan barta c. Barta c waxaa la yidhaada **Barta isgoyska** ama **Bar-kulanka** xarriiqaha toosan ee 'r' iyo 's'..

Hawlgalka-2

- 1** Baraha ku sawiran weydiimaha hoose ee b, t iyo J buugagttiina markaad ku guurisiin dabadeed idinka oo adeegsanaya mastarad labadii barood ee kasta, Xarriiqaha toosan ee dhexmara sawira.




- 2** Xarriiqaha toosan ee aad ku soo sawirteen su'aasha 1^{aad} baraha isgooyaska ama bar-kulanada ay wadaagaan sheega.

6.2 LAYDI, LABJIBBAARANE, SADDEXAGAL IYO GOOBO

Hawlgalka-3

Sawiradani waa qaabab laga sameeyey kaartoon




- 1 Shaxanno u eg qaababkan buugagttina ku sawira, ka dibna qaab kasta magaciisa ku dul qora.
- 2 Qaababkaad sawirteen mid kasta mid u eg ku ag sawira.

Sawiradan hoos ku sawiran waa qaabab sallaxeed.



- 3 Fasalkiina dhexdiisa u fiirsada walxaha laga helo. Ka dibna sheega kuwa leh waji.

b Laydi **t** goobo **j** labajibbaarane **x** saddexagal



Gurigan waxaa laga dhisay shaxannada laydi, labajibbaarane, saddexagal, iyo goobo: Shaxannada waxaa lagu tilmaamay (magacabay) xarfo. Xaraf kasta shaxanka uu tilmaamayo qor.

- | | | | |
|---|---|----|-------------------------------|
| 1 | Shaxanka b waa <u>labajibbaarane</u> . | 2 | Shaxanka t waa _____. |
| 3 | Shaxanka j waa _____. | 4 | Shaxanka x waa _____. |
| 5 | Shaxanka kh waa _____. | 6 | Shaxanka d waa _____. |
| 7 | Shaxanka r waa _____. | 8 | Shaxanka s waa _____. |
| 9 | Shaxanka sh waa _____. | 10 | Shaxanka dh waa _____. |

LAYLIS 3


1 Qeexida qaababka

Weedha hoose buugiina ku guuriya kadibna dhammaystira. Erayada sanduuqan dhexdiisa lagu dhigay meelaha bannaan midka ku haboon ku buuxiya.

Afar	laba	eber	toosan	isle'eg malaha
Saddex	hal	xoodan (golxan)	lammaane (qindi)	

- b** Laydi wuxuu leeyahay ____ dhinacyo toosan.
- t** Laydi wuxuu leeyahay afar dhinacyo _____.
- j** Laydigu wuxuu leeyahay __ dhinacyo lammaane ah oo isleeg.
- x** Laydigu wuxuu leeyahay laba ____ oo dhinacyo isleegah.
- kh** Labajibbaarane wuxuu leeyahay __ dhinacyo toosan.
- d** Labajibbaarane wuxuu leeyahay afar dhinac oo toosan oo _____.
- r** Saddexagal _____ dhinacyo golxan (xoodan).
- s** Saddaxagal wuxuu leeyahay dhinacyo toosan.
- sh** Goobo waxay leedahay ____ iyo _____.
- dh** Goobo _____ dhinacyo toosan.
- c** Labajibbaarane iyo laydi waxay leeyihiin _____ dhinacyo toosan.
- g** Labajibbaarane laydi iyo saddexagal _____ dhinacyo golxan (xoodan).
- 2** Sawira shaxanada hoos lagu tilmaamay, idinka oo mastarad adeegsanaya.
- b** Labajibbaarane dhererka dhinaciisu 6 sm yahay.
- t** Laydi dererkiisu yahay 4sm ballaciisuna yahay 3sm.
- j** Sawira saddexagal. Dabadeedna cabbira dhererrada dhinacyadiisa.
- 3** Sawira goobooyin kala duwan idinka oo adeegsanaya qadaadiicda (dhuruurida) sida tobanka saanti ah (caanteyn), shanta saanti kumi ama kontonka saanti (shilin) ama walxo kale oo qaabka goobada leh.

4 Eega sawirka dhinaca midigta ku sawiran, ka dibna weedhahan hoose u kala saara “been” ama “run”.



b shaxankani waa goobo **been**




t shaxankani waa laydi _____

j shaxankani waa labajiibaarane ____

x Laydigan waxaa lagu magacaabi karaa laydi ABCD _____

kh Laydigan waxa kale oo lagu magaabi karaa laydi ADCB, BCDA, CDAB ama DABC _____




5 Shaxanadan hoos lagu muujiyey sawira. Ka dibna magacaaba geesahooda.



6.3 SHAXANNADA QAABABKOODA LAGA HELO DEEGAANKA

Hawlgalka-4

Idinka oo isu kooxaynaya laba laba (qindi) ama lammaane u fiirsada sawirada hoos ku xusan. Ka dibna tafatira oo qora inta Laydi, Labajibbaarane, Saddexagal iyo Goobo ee uu sawir kastaa leeyahay.



LAYLIS 4

1 Calanka waddankeenu qaababka uu leeyahay qora.

2 Fasalkiina dhaxdiisa raadi waxyaalaha qaabkoodu yahay laydi, labajibbaarane, saddexagal iyo goobo.

Cutubka 7aad



LACAGTA ITOOBIYA



XUSUUSTA

Marka la soo koobo

- 1 Birr = 100 Saanti
- 1 Birr = 20 midkiiba 5 saantimo ah
- 1 Birr = 10 midkiiba 10 saantimo ah
- 1 Birr = 4 midkiiba 25 saantimo ah
- 1 Birr = 2 midkiiba 50 saantimo ah


Xusuusin: Qadaadiicda (duruurida) la cagteena Itoobiya oo loo xaqaano saantiim marka la soo gaabiyo waxaa loo qoraa saa

LAYLIS 1

- 1 Lacagta hoos lagu tilmaamay u beddela nooca sentiyo ee la magacaabay.
 - b 2 birr = _____ saantii
 - f 1 birr iyo 50 saantii waxay la mid tahay _ oo toban toban saantii ah
 - j 3 birr = _____ oo konton, konton saantii ah
 - x 4 birr imisa 25 saantii ayey leedahay
- 2 Halkii qalin qori qiimihiisu haddii uu yahay 60 saantii 6 birr imisa qalin qori ayaa lagu iibsan kari?


7.1 ISUGEYNTA IYO KALAGOYNTA LACAGTA

Tusaale 1



3 × 10 Birr

30 Birr



4 × 5 Birr

20 Birr

+ = 50 Birr

Tusaale 2



4 × 10 saanti

40 saa



2 × 50 saanti

100 saa



3 × 5 saanti


15 saa

40 saa + 100 saa + 15 saa = 155 saa = 1 Birr 55 saa


Hawlgalka-1

Sida tusaalaha sare lagu tusay isugeeya


b



_____ Birr



_____ Birr



_____ Birr

+ + = _____ Birr

†

_____ Saanti + _____ Saanti + _____ Saanti
= _____ Saanti

LAYLIS 2

1 Soo saal wadarta lacagta

b $30 \text{ Birr} + 80 \text{ birr} = \text{_____ Birr}$

† $25\text{saa} + 65\text{saa} = \text{_____ saa}$

j $100\text{saa} + 200\text{saa} = \text{_____ Birr}$

x $50 \text{ Birr} + 90 \text{ Birr} = \text{_____ Birr}$

2 Kalagooya lacagayawgan

b $80 \text{ Birr} - 50 \text{ Birr} = \text{_____ Birr}$

† $60\text{saa} - 25\text{saa} = \text{_____ saa}$

j $40 \text{ Birr} - 15 \text{ Birr} = \text{_____ Birr}$

7.2 DUKAANLAHA IYO MACAAMIISHIISA OO LACAGTA WAX KU KALA IIBSANAYA

Idinka oo koox koox ah iska warsada waxyaalaha uu qoyskiinu u baahan yahay Isla markaana

- 1 Faahfaahiya waxyaalaha aad maalin kasta iibsatiin.
- 2 Faahfaahiya waxyaalaha aad bil kasta iibsatiin.
- 3 Faahfaahiya waxyaalaha aad sannad kasta iibsatiin.
- 4 Faahfaahiya waxyaalaha aad iibsatiin maalmaha ciidaha kala geddisan



Hawlgalka-2

1	Nooca badeecada	Hal Qiimihiisa	Inta hal ee la iibsaday	Lacagta la bixiyay	Celis
b	saabuun	2 Birr iyo 25 saantii	2	5 Birr	
t	dhagaxa bitijoorka	1 Birr iyo 50 saantii	3	10 Birr	
j	Nacnac	25 saantii	5	2 Birr	
x	Mastarad	30 saantii	2	2 Birr	
kh	Saliida timaha	4 Birr	2	10 Birr	
d	Qalin qori	1 Birr iyo 25 saanti	2	3 Birr	

2 Meelaha bannaan tirada ku haboon ku buuxiya.

b 60 saantii + 35 saantii = _____ saantii

t 70 saantii + 25 saantii = _____ saantii

j 4 birr + 3 birr = _____ birr

x 80 saantii + 60 saanti = _____ birr iyo ____ saantii.

LAYLIS 3

- 1** Qiimaha halka saabuuntu haddii ayatahay 2 birr iyo 50 saantii 3 hal oo saabuun in la iibsado, imisa Birr ayaa loo baahan yahay?
- 2** Halkii furun (rooti) qiimihiisu haddii uu 75 saantii yahay 6 Birr imisa hal oo furun ah ayaa lagu iibsano?
- 3** 1 baakidhka dhagaxa bitijoorku wuxuu qaadaa 12 Haddii qiimaha 1 dhagaxa bitijoorku yahay 1 birr iyo 25 saantiim, imisa Birr ayaa loo baahan si loo iibsado 2 baakid?
- 4** Saliida timaha halkii qaruuro (dhalo) qiimaheedu waa 3 Birr iyo 50 saantiim. Haddii dukaanlaha aan 5 Birr oo isku taala aan u dhiibno Imisa ayuu inoo soo celin?
- 5** Haddii qiimaha 1 kilogram oo sonkor ah uu yahay 14 Birr Imisa ayaan u baahnaynaa si aan u iibsano 1 kiilo rubiciis?

Cutubka

8aad



WAQTIGA (AMMINTA)


8.1 AKHRINTA SAACADDA

Tani waa saacad sawirkeed

Saacadani waxay leedahay laba gacmood oo tilmaamayaal ah.

- gacanta dheeri waa daqiiqad tiriso.
- gacanta gaabani waa saacad tiriso

Marka daqiiqad tirisadu (gacanta dheeri) ay 12 is dul taagto, saacad tirisadu. tirada ay isdul taagto waxay sheegi ammintu (waqtiga) saacada ay tahay.



Tusaale 1

Sawirka saacada ee dhinaca midigta ku muujisan gacanta dheeri (daqiiqad tirisadu) waxay dul taagan tahay 12, gacanta gaabanina (saacad tirisada) waxay dul taagan tahay 5.

Sidaas darteed sawirka saacaddu wuxuu tilmaamayaa 5 saac



Waxa loo akhriyaa

Shan saac

waxaana loo qora

5 : 00



Saacad Daqiiqad

Hawlgalka-1

Sheega Sawirka Saacaddu amminta ay tilmaamayso?



Waxa loo akhriyaa waxaana loo qoraa

Daqiiqad tirisadu (gacanta dheeri) marka ay 6 dul laagan tahay waxay tilmaamu tahay oo ay ku tusaysaa saacad badhkeed.

Tusaale 2

Sida sawirka lagu muujiyey gacanta dheeri waxay dul taagan tahay 6. Gacanta gaabanina waxay yar dhaafsan tahay 7



Sawirka saacaddu amminta ay tilmaamayso sidee loo akhriyaa? sideese loo qoraa?

Waxa loo akhriyaa toddoba saac waxaana loo qoraa

7:30

Hawlgalka-2

Sheeg sawirka saacaddu waqtiga ay tilmaamayso?



Waxa loo akhriyaa waxaana loo qoraa

Daqiiqad tirisadu (gacanta dheeri) marka ay 3 dul taagan tahay waxay tilmaanta saacad rubuceed.

Tusaale 3

Marka gacanta dheeri ay 3 dul taagan tahay ta gaabanina ay waxoogaa ka yar siqday 7da saacadu waqtiga ay tahay sidee loo akhriyaa loona qoraa?



Waxa loo akhriyaa

toddoba Saac iyo rubuc

waxana loo qoraa

7:15

Hawlgalka-3

Idinka oo ku dhawaaqaya akhriya amminta ay saacaddu tilmaamayso isla markaana qora.



Waxa loo akhriyaa

waxaana loo qoraa

LAYLIS 1

1 Idinka oo ku dhawaaqaya sheega sawirada saacadahani amminta ay tilmaamyaan

b



t



j




x




2 Jawaabta ku haboon sawirka saacada waqtigaay tilmaamayaso hadheeya (madoobeeya)

b



12:15
7:30
7:00


t



3:15
5:15
5:30

3 Sawirka Saacadda dhexdeeda ku sawira gacmaha si aad u muujisiin. Amminta Saacadda ee la idin siiyey.

b **t** **j** **x**



5:00 Saac 11:00 Saac 2:15 8:30

(laba Saac iyo rubuc) (siddeed Saac iyo badh)


8.2 XIDHIIDHKA KA DHEXEYA SAACADDA IYO DAQIIQADAHA

Saacadiyo daqiiqad waa halbeegyada lagu cabbiro amminta (waqtiga).

$$1 \text{ Saac} = 60 \text{ daqiiqo}$$

$$\text{badh saac} \left(\frac{1}{2} \text{ saac} \right) = 30 \text{ daqiiqo}$$

$$\text{rubuc Saac} \left(\frac{1}{4} \text{ saac} \right) = 15 \text{ daqiiqo}$$



LAYLIS 2

i Qoraalka iyo sawirka saacadda isku aadiya

1 5:15

B



2 7:30

T



3 5:00

J



4 11:15

X



5 2:30

KH



ii Meelaha bannaan ku buuxiya amminta (waqtiga) Saacadda ee aad ku fulisid hawlahaan hoos lagu tilmaamay.

b Aroortii Saacadda aad hurddada ka toostid

t Wajiga inta aad maydhatid oo aad quraacatid. Saacadda aad tagtid dugsiga waxbarashada


j Saacadda safka inta aad istaagtid aad isku diyaarisid heesta calanka

x Saacadda xiisada u horeysa la bilaabo _____ iyo saacadda xiisada u dambeysa la dhameeyo

kh Saacadda qadada loo fasaxo _____ ilaa

Cutubka

Gaadi



XOG-URURINTA IYO HABYAALKA

9.1 SOO URURINTA XOGAHA FUDUD

Hawlgalka-1

Arday inta uu Fasalka ka kaco sanduuqa waxyaala ku Jira ardayda inta uu weydiiyo ha ururiyo xog.

- 1 Sanduuqa dhexdiisa imisa sawirka goobada ayaa ku Jira?
- 2 Tirada riyuhu tirada wananka ?
- 3 Sheega sawirada ay tiradoodu badan tahay?

Hawlgalka-2

Ardaydu guryahooda haka soo ururiyaan xogo ah oo ku saabsan weydiimaha hoos ku xusan.

- gurigoodu imisa qof oo qoyskooda ka tirsan ayuu leeyahay?
- gurigooda tirada dheddigga iyo labka tee baa badan?
- gurigooda dhexdiisa xayawaannada carbisan ee uu leeyahay dhammaantood ha diiwaangeliyaan.

LAYLIS 9.1

Idinka oo adeegsanaya shaxdan hoos ku muujisan ka jawaaba weydiimaha la xidhiidha.

Ciyaaraha isbootiga	Kubbadda Cagta	Kubbadda gacanta	Bootinta	Lagdinta	Kubbadda kolayga
Tirada ardayda fasalka ee Jecel	9	3	5	6	4

- 1 Imisa arday ayaa kubbadda Cagta Jecel?
- 2 Ciyaarta ay ardayda ugu tirada yari jeceshahay waa tee?
- 3 Ciyaarta ay ardayda tirada ugu fara badani jeceshay waa tee?
- 4 Tirada ardayda ciyaarta lagdinta Jeceli imisa ayey dheer tahay tirada ardayda kubbadda kolayga Jecel?

9.2 SHAXDA XOGAHA FUDUD

LAYLSI 9.2

- 1 Shaxannadan qaabkooda ku kala sooca
Tirada labaJibbaarane _____
Tirada Saddexagal _____
- 2 Shaxannada ku kala sooca midabka lagu midabeeyey
Tirada shaxanada qalin cas lagu qalimeeyau _____
Tirada shaxanada aanan la midabaynin _____
- 3 Korka Jawaabihiina shaxdan hoos ku taal ku muujiya.

	La midabeeyay	Aanan la midabaynin
Tirada labajibbaarane		
Tirada Saddexagal		

9.3 HAB-YAALLADA FUDUD EE WAAXAHA IYO TIROOYINKA

Hawlgalka-3

Idinka oo lammaane ah (Labo-labo ah) soo ururiya walxaha agagaarkiina laga helo ee qaababka kala duwan leh. Ka dibna sameeya habyaallo ka kooban walxaha aad soo ururiseen.

Tusaale

Walxaha la soo ururiyey haddii ay yihiin 3 kubbadood 3 qaruuradood iyo 3 koob, sidan soo socota ayaa habyaalo ka kooban walxahan loo samayn karaa.

- Iyada oo saddex saddex noocyada isku midka ah la isku daba taxayo



- Iyada oo hal hal la isku weydaarinayo la isdaba tixi, oo la samayn habyaal ka duwan kii hore.



LAYLIS 9.3

Weydiimahan dhammaystira

b ▲▲, ▲▲, ▲▲, _____, _____, _____.

t ■●●▲, ■●●▲, ■ _____, _____, _____.

j 1, 3, 5, _____, _____, _____, _____.

kh 2, 4, 6, _____, _____, _____, 14, _____.

